Miisaanka Maansada Soomaaliyeed (MMS):Midayn iyo Midhiftir.

WQ:Cali Ileeye

Qormadii 1aad

Hordhac

-Bisinkaan ku bilaabay Shaydaan ha baygagee-

Intiina u dhuun-daloosha arrimaha Suugaantu marka aad dheehataan tabeelaha sare ama aad maqashaanba Miisaanka Maansada Soomaaliyeed (MMS) waxa la yaabaa inuu maankiisa kusoo dagdago murankii dabada dheeraaday ee la xidhiidhay cidda leh daahfurka MMS, kaas oo u dhexeeyay labada Af-aqool waa Marxuum/Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac Gaariye (IHU) iyo Bare-sare C/laahi Diiriye Guuleed (Caraale),waa run waxa ay ahayd dhacdo xiisaheeda leh ama uguba ku ahayd fagaarayaasha Suugaanta lagu falanqeeyo. Inkasta oo ay jirto in aan wali lagu kala calaf qaadin murankaas isaga ah ama aan la isla garwaaqsan cidii la huwin lahaa ladhka Aabaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed hadana kasmo badan oo cilmigaas la xidhiidha ayaa laga korodhsaday lafagurkaa isaga ah.

Inaga oo aan ku xiiqin kuna xabeeban ku talaxtaga iyo ku sii tiigaalka doodaasi - talaabo dhiiran inta aynu hore u qaadno inaga oo ka halcelinayna wacaashi Caraale & Gaariye ee ahayd in is-barbardhig iyo rogrogisba lagu sameeyo labada aragtiyood si loo ogaado tooda cabboon, sidoo kalena maanka ku hayna soo jeedintii suugaan-dhaadhi badan oo kale ay ku baaqeen -maadaama MMS uu yahay daahfurkii ugu cuddoonaa dhinaca afka ee maskax soomaaliyeed kasoo maaxda ilaa hadda, in aan lagu curdin-dhadhin muran madhalays ah ee lasii badhitaaro, lana horumariyo si uu taabagal u noqdo-waxa aan halkan kusoo bandhigi doonaa Qormo taxane inoo noqon doonta –idamka alle,taas oo dulucda, dabuubta iyo dawliilkeeduba noqon doono :Midaynta iyo Midhitirka Miisaanka Maansada Soomaaliyeed (MMMS).Haa, kadib baadhis dheer iyo lafagur aan ku sameeyay labada aragtiyood ee MMS waxa iiga soo dhuroobay in ay qabyo badani ka muuqato labadaba. Si kale hadii aan u nidhaahno labada midna kali ahaanteed uma buuxin karto inay noqoto halbeeg lagu cabbiro MMS. Arintaasina waata igu dhalisay in aan isku soo minguuriyo isuna soo jiido labada cilmibaadhiseed, wixii dhiman ee ii muqdana aan ugu kaabo intii karaankayga ah-halkii aan mid ahaan si indho-la'aana garabka u saari lahaa ama aan u falkin lahaaba aragti cusub oo aan loo baahnayn.

Akhriste; taas macnaheedu maaha inaan dafirayo,durayo ama aan duudsiyayo dadaalka iyo waxqabadka mugga leh ee labada Halyey-Xaasha! waxa aan ahay Ardaygoodii,balse aragti kastaa waa ay so martaa heerka gardaadinta iyo gurguurashada, kasmadan socod baradka ahina si ay u hanaqaado waxa ay u baahan tahay gacan qabasho-dabkuba soo ma uu dameen hadaan dogobyo la sii saarin ee la dugsado'uun .Miyaa nay haboonayn hadaba in la helo halbeeg mid ah oo ay yeelato Maansada Soomaaliyeed, si loo gaadho waxa aynu higsanayno oo ah Tix Soomaaliyeed oo ka fayoow Dalab iyo Deelqaaf.

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Mar kale si aanay odhaahdani ugu muuqan mid laab-la-kac ah waxa aynu qormooyinkan si faahfaahsan isu dultaagi doonaa qodoba dhawr kuwaas oo ah baalasha ay ku haadi doonto cilmi baadhistani. Marka hore waxa aynu Gogoldhig kooban ku gorfayn doonaa Suugaanta iyo waaxyaheeda inaga oo is dul taagi doona waxa ay ku kala duwan yihiin Tix iyo Tiraab .Waxa aynu ka halcelin doonaa waydiinta ah waa maxay Miisaanka Maansadu? Dheef se' muxuu inoo leeyahay?.
Intaa ka dib waxa aynu is-barbardhig ku suubin doonaa Labada cilmibaadhiseed inaga oo fiirin doona waxa ay ka midaysan yihiin iyo waxa ay ku kala tagsan yihiin, sidoo kalena waxa aynu saari doonaa halbeegyo sugan si aynu u ogaano tibaaxda ay ka bixinayaan qodobada hoose:

1-Miisaanka Maansada (hore).
2-Midhiftirka Maansada (la unkayo).
3-Kala soocida Badaha Maansada.
4-Xidhiidhka ka dhexeeya Badaha Maansada.
5-Hab-samaysanka Badaha Maansada.
6-Daahfurka Badaha Maansada.
7-Xeerarka iyo Eraybixinta Kasmada.

Inta ka dib waxa aynu kusoo durki doonaa Midaynta Miisaanka Maansada Soomaaliyeed inaga oo adeegsan doona bado maanso oo kala gadisan, sidoo kalena waxa aynu daaha ka faydi doonaa aragti cusub oo qeexasa in 100% Badaha Maanasada ay asal ahaan ka soo jeedaan ama ay unkeen Dumarku! Taas oo Af-gambi ku ridi doonta aragtiyaha dib-u-socodka ah ee dada kaalinta foolaadnimo ee Haweenku kaga jiraan suugaanta Soomaalida. Gabdagabada wixii inooga soo baxo Cilmi-baadhistan waxa aan kusoo ururin doonaa Dhigane aan hada gacanta ku hayo si uu dhaxalreeb ugu noqdo facyowga danbe.

Gogoldhig

Buuniga ku xeeldheer abla-ablaynta Afafka ee loo yaqaano Afaqoolku marka ay kala dhigdhigayaan Af gaar ah waxa ay u qaybiyaan siyaabo kala duwan . hadba xagal ayay iska taagan si ay ugua salgaadhaan kasmo-doceeda ay markaa u gol leeyihiin ama dadkaba ugu fududeeyaan fahanka xogteeda,hadaba inkasta oo Afsoomaaligu yahay af guun ah kana mid ah Afafka dunida ugu hodansan dhinaca murtida iyo midhahaba- iyada oo sahamiyayaashii iyo dhulmareenkii shisheeye ee milay hore carrigeena yimi kadib markii ay la ashqaraareen quruxda iyo qotodheerida Afkeena ay ku magacaabi jireen Ciiddeena -**Dhulkii Gabayga iyo Gabyaaga**,hadana xayndaabka iyo xeerarka afkeenu ma aha kuwo wali saldhigay ama la isku raacsan yahay .Taana waxa loo aanayn karaa qoraal la'aantii afkeena, oo iyada lafteeda ay sal u ahayd habdhaqanka reer guuraanimo ee Soomaalida oo afka ka sokow siyaabo badan oo togan u saameeyay nolosheena Qaranimo iyo tan Qowmiyadeedba.

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Inaga oo taa maanka ku hayna afka Dhisme (Naxwe) ahaan waxa aynu qaybin karnaa Magac ,Fal iyo Xaraf.Dhadhan ahaan Or iyo Eray , Dhugmo ahaana War iyo Wacaal Iwm…Kasmooyinkan mid waliba waa cilmi gaarkiisa u madaxbanaan oo aynaan halkan kaga hadlayne,Afsoomaaliga marka aynu ka fiirino daaqada Suugaanta waxa loo qaybiyaa laba qaybood oo kala ah Tix (Qodbane) iyo Tiraab (Qubane).Labadana waxa la isku yidhaahdaa Hawraar oo la macne ah Suugaan.

Suugaaneey Maxaa aad tahay ?

Suugaanta af ahaan waxa ay Soomaalidu u taqaan:
1-Meesha cosobka iyo cagaarka leh
2-Saxansaxada ama qayoodka roobka
3-Ciidda niista ah ee aan lahayn quruuruxa (Suugaantu gogol weeye)-Hadraawi-sirta Nolosha.
4-Gunuuska- Suugaani hadal maaha.
Erey bixin ahaan: Suugaantu (Waa iidaanka ama koosaarka hadalka) Ismaaciil Jiheeye.
Si kale hadii aan u qeexnana Suugaantu waa ((Hadalka kiisa Dhisme,Dhadhan iyo Dheelitir ahaanba cabboon ee ay Dhagtu jamato dhagaysigiisa Ishuna ay ku dhaygagto akhriskiisa Kashuna ay dhuuxdo duxdiisa)).
Kasmaalid:

- Isbarbardhig ku same labada eray ee Suugo – Suugaan, Duule – Duulaan.waxa dhadhana ma kuu samaynayaan?!

Bal akhriste U fiirso Tusaalayaashan :
1- judhay caanuhu kaa siibtaan niyow inta danbe ayuunbaa lagu dhagaa!.
2-Caanuhu marka ay kaa qubtaan hanbada ayaa la qabtaa.
3-Caano daatay dabadood la qabay.
4-Hadhuub daatay Caanaha , Hanbadaa la qaban jiray.
Halkaa maxaa inooga soo baxay?. Tusaalaha koowaad waxa aynu adeegsanay Af-maalmeed ahna ka aynu ku tiraabno nolol maalmeedkeena caadiga ah inaga oo aan Naxwe ahaan iyo Nuxur ahaan toona eegin inuu toolmoon yahay balse ujeedadeena oo qudha ku gudbina,Suugaana laguma tilmaami karo.

Saddexda tusaale ee soo hadhay waxa iska cad inay kii hore ka dhumuc wayn yihiin iyaga laftooduna ay sii kala sarreeyaan . waxa ay kala yihiin Afmuceed, Maahmaah , Iyo Tuduc Maanso-sida ay u kala horeeyaan, Intubana waxa ay ku arooraan Suugaanta . Labada hore waa Tiraab halka tusaalaha Afraad uu ka yahay Tix.
Tix oo ah ta aynu u soo xadhko-xidhanay ha inoo danbaysee ,Tiraabta inta aynu ku hakano aynu wax yar ka nidhaahno.

Af-ahaan:Tiraabtu waa; Qaab u dhihida hadalka,Maansada waa la tiriyaa halka hadalka lagu tiraabo.
Eray-bixin ahaan waa : Hadalka Kiisa habboon ee ka sareeya Afmaalmeedka Tixdana ka hooseeya. Si kale hadii aynu u dhignana Tiraab waa ((Hadal kasta oo dhisme ahaan cuddoon balse aan ku qasbanayn inuu yeesho habdhac iyo halraac sugan)).

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Tiraabtu maxaa ay u qaybsantaa?
Tiraabta waxa ay ka kooban tahay laamo badan oo magool iyo manba huwiya geedka suugaanta waxaana ka mid ah:
1.Afmuceedka 2.Maahmaahda 3.Murtida 3.Sheekada(dhaqameed iyo faneed)
3.Jirrab (halxidhaale,googaalysi,carabjalqin) IWM…..
Wada garate ayaan filayaa badidooda.Afmuceedka ayaa kaa dagi la malaha ! Aynu yara jilcino'e waa ((Afka rasmiga ah ee ka dhexeeya bulshowayn-deegaan iyo dad gooniyana aan gaar u ahayn, kaas oo loo adeegsado warmurtiyeedka , warbaahinta, dhiganayaasha (Buug),baanaha,Sheeko-faneeda Iwm.
Xusuusnoow: Hees Muusiga, Jilane (riwaayad iyo filin) iyo Ciyaar dhaqameedu suugaan ma aha ee waa fan.

>Kasmaalid.

- Is-barbardhig Afmaalmeedka (Suuqdiga,Afdegel ,Lahjadaha) iyo Af-muceedka.
- Afmaygu ma af sidiisa u madaxbanaan baa mise waa laan ka mid ah afsoomaaliga?
- Soomaalidu ma leedahay Afmuceed ka dhexeeya mise ninba sida uu ugu hadlo afka ayuu u qoraa?

Suugaantu waa badweyn aan laga gayoonayn ne' si aanu yoolku inooga lumin aynu nidhaahno halka loo danleeyahay adna diiradaay qabo.Qormadii hore waxa aynu ku taabanay ujeedada Taxanaheena oo aynu ku sheegnay Midayna Miisaanka Maansada Soomaaliyeed MMS,walina waxa aynu dhex gooshanaa badweynta Afkeena baaxada iyo bilicda leh.Maanta waxa aynu ka soo shiraaqanay xeebta abla-ablaynta afka inaga oo dalxiis ku soo marnay xeeliga cagaaran ee suugaanta cabaarna ku hakanay Soonaha Tiraabta.Qormada danbe waxa aynu Baroosinka dhigan doonaa Jasiirada Tixda oo ah kobta laga helay Canbarkii Dahsoonaa (MMS).

Eray bixin
1-Buuni : Macalin ama Bare
2-Af-aqool: dadka ku xeeldheer cilmiga afafka.

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Qormadii 2aad

Qormadii hore waxa aynu kusoo qaadanay qaybaha suugaanta Soomaaliyeed inaga oo iftiiminay waxa ay ku kala duwan yihiin Tix iyo Tiraab, gaar ahaana waxa aynu is-dultaagnay tiraabta iyo waaxyaheeda.Qormadanwaxa aynu ku dhigdhigi doonaa Tixda(Badaha Maansada ee kala duwan),inaga oo qeexi doona waxa uu yahay Miisaanka Maansada Soomaaliyeed (MMS),sidoo kale waxa aynu faaqidi doonaa qodobka 1aad ee MMS oo ah sida dalabta ama laaxinka looga jiro maansada.

Waa Maxay Tixdu?
Tix iyo Maanso Af-ahaan waa laba eray oo isku ujeedo tilmaamaya.Tusaale ahaan Caraale marka uu kala qalayo Suugaanta waxa uu u qaybiyaa Qubane iyo Maanso.Si kale hadii loo dhigo qubane waa tiraab,maansana waa tix.Mar hadii aynu nidhi tiraabtu waa qubane, tixdu miyaanay haboonayn in lagu sheego qodbane*?
Waayo,waxa ay leedahay xeerar iyo qodobo aanay ka gudbi karin oo tiraabta ka sooca.
Eraybixin ahaan: halkan Tix waxa aynu uga Jeednaa Badaha Maansada oo isku dhan.

Akhriste bal dhugo saddexdan meeris.

1-Dugsi male qabyaaladi waxay dumiso mooyaane – Timacade.
2- Waar toloow colka jooja – Salaan Carrabey .
3-Marada labadeeda dacal buu dab ii qabsaday!. – Saado C. Amare

Inkasta oo saddexdan tuduc* ay tusmo ahaan kala dheeryihiin,habdhacooduna aad u kala durugsan yahay hadana dad badani ma kala saari karaan badaha ay ku kala arooraan.Inyar ayaa tilmaami karta in ka hore yahay meeris gabay ,ka labaad geeraar, kan saddexaadnaa tuduc buraanbur .
Badaha Maansada ee ay Caraale iyo Gaariye daahfureen waa ilaa 15 bad maanso oo ay 10 ka mid ah wadaagaan.Balse qormooyinka danbe waxa aynu ku faaqidi doonaa tirada iyo tafniidka bado maanso oo intan ka badan e' hadii aynu wax ka xusno badaha Maansada waxa mid ah ka mid ah –sida ay u kala caan sanyihiin marka loo taxo:
Gabayga,Jiiftada,Buraanburka, Heellada , Geeraarka,Halaanhalka , Foofka(Maqasha), Cawska, Kabada, Shirrabka, Mullaaxda, Mooyaha, Saarka, Biitada,Iwm.

Xusuusnow: ha isku khaldin Badaha maansada iyo Ciyaar dhaqameeda,waayo ciyaar dhaqameedu waa Fan maansaduna waa Suugaan tusaale ahaan marka Dhaantada la dheelayo waxa la adeegsadaa bado maanso oo kala duwan sida Heellada iyo geeraarka!.

Hadaba inta aynaan gudagalin MMS –oo ay kala-soocida badaha maansadu tahay xubin ka mid ah xogta baaxada leh ee Cilmigani xambaarsan yahay-Akhriste bal ila dhugo waydiimahan oo inoo bidhiiqin doona mucda MMS .

Gaaridaan jeclaayeey
Gabadhaan jeclaayeey

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Labadan Meeris keebaa Cuddoon?

Allaa faxane foolxumada waa laga ducaystaaye
Meeriskan deelqaaf* baa ku jira waayo?
(2)
Nin labaatan buuxsamay iyo adduun waa legdamayaane
Nin labaatan jira iyo adduun waa legdamayaane.
Labadan tuduc kee buu laaxin* ku jiraaa?
(3)
Sida geed caleenloo.
Sida geedad caleenloo.
Labadan meeris ma bad maanso ayaa ay ku wada arooraan?

1-Xidigtii qarniganeey
2-Xidigtii qarniganeey wa'
Labadan Bad Maanso wax xidhiidh ahi maka dhexeeyaa?

1-Maqaleey warlaay
2-Helleey maqaleey warlaay
Helleey markaynu ku kordhinay Baddi Maqasha maxaa inoo soo baxay?

Akhriste Waydiimahan mid waliba waxa ay ku qotontaa tiir ka mid ah tiiraka uu ku qotomo MMS oo aynu ka xusi karno:
Habdhiska iyo Hanaanka Maansada (Dhererka)*
Halraaca (Xarafraaca) Maansada*
Habdhaca Maansada *
Xidhiidhka ka dhexeeya Badaha Maansada
Kala-asoorida Badaha Maansada
Habsamaysanka Badaha Maansada…..Iyo kuwo kale.
Hadba waydiimahan si aynu uga warcelino waxa aynu u baahanahay in aynu dhuuxno MMS.

Soomaalida oo ah dad lagu majeerto curinta iyo hal-abuurka maansadu milay aad u fogba waa ay ku baraarugsanaayeen in tixdoodu ay leedahay xeerar iyo xariiqyo lama dhaafaan ah oo ay raacdo, dhagtooda carbisanina waxa ay qaban jirtay meesha ay Maansadu ka leedahay Dalabta ama Deelqaafka. Ogobeey, halkaas uun kagama ay hadhine waxa ay u sameeyen maanso kasta halbeeg iyo jaantus lagu Miisaamo.

Tusaale ahaan Gabayga iyo Heelada waxa ay halbeeg uga dhigeen Meerisyadan sida ay u kala horeeyaan:

Hoobaalayeey hobalayeey hobalayeey hoobe.
Helooy helelooy helaaligayeey.

Labadan tuduc waxa ay si cad inoo tusayaan dhererka meeriska maanso.Halraaca iyo inta meelood ee xarafku ka gali-karo meeriska iyo waliba godadka qodobka oo ah shaqalka jaangooya habdhaca maansada! Dib ayaynu ka faahfaahin doonaa arinkan e',xeerarka Maansada xili hada

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

laga joogo Qarni iyo dheeraad waxa si qayaxan oo aan madmadow lahay u qeexay abwaankii muulka ahaa ee Salaan Carabey(IHUN) .Isaga oo ugu baanaya hal-abuurkii faciisa aha baac-fogaanta hibadiisa gabyaanimo miyaanu arartiisa ku xardhin Meerisyadan hoose oo baal-dahaba ka gali doona Sooyaalka MMS.Wuxu yidhi:

Qanjaa hadalka nimanbaan ka gurin qaamurna u jilane.
Hadba xarafka anigaw qadima qiilka joogsadaye.
Meeshuu qalooc kaga jiraan qun uga saaraayee.

Halkan abwaanku waxa uu inoogu qeexay labada tiir ee aanay la'aantood Maansada Soomaaliyeed istaagi karin-Waa Halraaca iyo Habdhaca e'.habdhacu waxa uu qumiya maansada oo uu ka tiraa dalabta waxa kale oo uu ka soocaa badaha Kale.Halka uu halraacu (Xarafraacu) maansada ka dhawro deelqaafka sidoo kalena uu u qurxiyo-xogtiisa iyo xeerarkiisu kama xiiso yara kuwa Habdhaca ,bal ogow se' cilmibaadhista Caraale iyo ta Gaariyeba halraaca waa ay ka indho qarsadeen!.

Waa Maxay MMS?

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed (MMS) Waa: ((**Cilmiga miisaanka,midhiftirka* iyo Kala-soocida Badaha Maansada**)).
Waa hagaag.Inkasta oo aynu hadaba isla qirnay in ay soomaalidii hore lahaayen meerisyo halkudhig ah oo ay ku beegan maanasadooda dhagtooda carbisanina ay qaban jirtay meesha uu meeriska dalabtan ku leeyahay ama deelqaafku kaga jiro hadana 1970-yadii ayuunbay ahayd markii ay Bare sare Caraale iyo Gaariye (IHUN) uu midba gaarkiisa si climiya u daahfuro MMS, kaas oo ah cilmiga dhiga xeerarka iyo xaagaanka ay ku socoto maansada soomaaliyeed
* kunoqo qormadii koowaad si aad u aragto faahfaahin intan ka badan oo ku saabsan labada aragtiyood iyo ujeedada taxanaheena.

Akhriste:

Sideedaba Maansada waxa laga unkaa meerisyo la isku taxay oo iyaga laftoodu ka samaysa erayo isu tagay.Erayaduna waxa ay ka abuurmaan xubno dhawaq oo midoobay,Iyaga qudhoodana waxa loo sii kala dhambali karaa Shibbanayaal iyo shaqalo.Sidaa darteed marka Maansada la beegayo meeris walba gaarkiisa ayaa loo miisaamayaa,shaqalada iyo xubnaha dhawaqna kaalin weyn ayay ka qaataan miisaanka meeriska.Tusaale aynu ku muujino arintaa:

Dugsi maleh qabyaaladi
Waa darata baahida. Gaariye.

Waa laba meeris oo jiifto ah.Tuduca koowaad hadaynu soo qaadano waxa uu ka samaysan yahay Saddexda eray ee ka ah **Dugsi-Maleh-qabyaaladi** eray walbana waxa uu ka unkamaa xubno sida ;
qabyaaladi = **qab+yaa+la+di** , waa affar xubnood oo dhawaq ,xubin kastaana waxa laga sii unkay shibbane iyo shaqalo **(qab= qb iyo a).**

Hordhacaa kooban hadii aynu isla garanayn aynu usoo daadagno dulucda qormadeenna oo maanta aynu ku balaysimi doono isbarbardhiga labada

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

aragtiyood –waa ta Gaariye (IHUN) iyo ta Caraale ,aynu ku bilowno halbegyadii aynu dhiganay qormadii koowaad kuwaas oo aynu nidhi waxa aan ku beegi doonaa labada aragtiyoood,qodobka koowaadna waxa uu ahaa :

1-Miisaanka Maansada hore (dalab iyo deelqaaf)
Maansada hore loo curiyay ama jirtaba marka la miisamayo waxa laga eegaa labada cudur ee kala ah dalabta iyo deelqafka .Waxa aynu ku horayn doonaa dalabta iyo sida looga dhawro Maansada.

1-Dalabta:
Dalabtu waa laaxinka ama qalooca ku yimaada habdhaca ama qummanaanta meeriska maansada, kaas oo gaadhi kara heerka jabniinka Ts:
Safiya xaajiyeey soo soco waan ku sugayaaye-Meeris jaban
Soo soco safiya xaajiyeey waan ku sugayaaye-Meeris Cuddoon
Si hadaba laaxinka looga dhawro meeriska waxa la eegaa qodobadan soo socda:
B-Dhererka meeriska
T- Habdhaca meeriska
J- Dheelitirka Meeriska.Maxaa ay ka yidhaahdeen arintaas Labada aragtiyood .

B-Dhererka Meeriska.
1-Aragtida Gaariye.
Bad maanso kasta meerisyadeedu waxa ay leeyihiin dherer go'an oo ay ka siman yihiin ama isku mid ah oo laga cabiro shaqalka. isaga oo arinkaa ka hadlaya Gaariye waxa uu yidhi(Bayd kasta oo Jiifto waa inuu noqdo sagaaley ama tobanley ay xundhurtu isu dheeli tirto).

Inkasta oo uu Gaariye carabaabay jiiftada oo qudha hadana si guud meersi-maanso kastaa waxa uu leeyahy dherer cayiman,halka uu ka yidhi (IHUN) Jiiftadu waa sagaaley ama tobanleyna anu waxan rumaysanahay in ay jiiftadu sagaal shaqalley tahay oo uu shaqalka tobenlayda ku dheeraadka ahi yahay abuur dhinaca erayga ah iyo farshaxanimo daro ay hal-abuurka qaar ka fursan waayeen.Taana waxa ka marag ah kala cuddoonaanta ka sokow in aan lasoo helin karim maanso dhamaan meersiyadeedu ay tobanley yihiin ama u badan yihiinba.

Gaariye marka uu eegayo dhererka meeriska maanso waxa uu ka tiriyaaa Shaqalka aynu dhawr bad maanso isla eegno.

1-Jiifto: Waa sagaal shaqalley:

Tr	Meeris Jiifto	Dhererka	Abwaanka
1	Sida geed caleenloo	9 shaqal	MS Bidde
2	Ubaxuna tin iyo cidhib	9 shaqal	Hadraawi
3	Habartii docdeediyo	9 shaqal	C Iidaan

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

2-gabay: waa labaatan shaqalle

Tr	Meeris Gabay	Dhererka	Abwaanka
1	Anse ila ah aakhiru sabaan idibilkiisiiye	20 shaqal	F.Nuur
2	Gobonimadu waa libin ku taxan geedi nololeede	20 shaqal	Hadraawi
3	Daab gudimo wali sooma jarin wiilashaan diraye	20 shaqal	Qaasim

3- Badda Zaarka: waa 10 shaqalley

Tr	Meeriska Zaarka	Dhererka	Abwaan
1	Kumaa helayoo halmacay	10 shaqal	Hidiyo dhaqan
2	Habluhu gaagaabanaa	10 shaqal	=
3	Hoheey bohalaha xargaga	10 shaqal	=

4- Badda Maqasha waa 7 shaqalley

Tr	Meeriska Maqasha	Dhererka	Abwaan
1	Maqaleey warlaay	7 shaqal	Hidiyo dhaqan
2	Malaguu waramay	7 shaqal	=
3	Sumaloow darbane	7 shaqal	=

. **5- Badda Kabada** waa 28 shaqalley

Tr	Meeriska Kabada	Dhererka	Abwaan
1	Geedba geedka u dheer laga garaacyeey, galool mudhay mulaaxdiiyeey	28 shaqal	H dhaqan
2	Naagta kabada leheey kaalin daraneey, adaan kayd u sii dhiganeey	28 shaqal	=

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

3	Xaabsatooy kabadeey xadhig ma reebeey, allow bilis xilkeed qariyeey	28 shaqal	=

2-Aragtida Caraale ee dhererka Meeriska Maanso.
Haddii aynu isla so aragnay qaabka ay aragtida Gaariye (IHUN) u cabirayso dhererka meeriska maanso oo laga tiriyo shaqalka, qormadan waxa aynu ku lafa-guri doonaa aragtida Caraale ee dhererka meeriska .waxa aynu faaqidi doonaa sida uu Caraale dhererka meeriska uga hadlay iyo waxa ay ku kala duwan yihiin aragtidiisa dhererka iyo ta Gaariye. Gebogabdana waxa aynu aragti mid ah ka soo saari doonaa dhererka meeriska badaha maansada soomaaliyeed oo labada abwaanba u dhex ah.

Caraale saddex xeer ayuu u qaydaa halbeega Miisaanka Maansada Soomaaliyeed MMS , xeerka koowaad ayaa u dhigan sidan:
-Dheelitir tiro allan iyo tu shaqal dheere.
Qodobkan Caraale waxa uu u adeegsaday dhererka meeriska Maanso waxaana u marag ah marka uu meeriska heello ka hadlayo waxa uu odhanayaa Caraale (Ogobeey meeriska heello iyo hojiska gabay waa isku dherer ee hormaynta iyo tusmayna ayaa kala xeera)) hormaynta iyo tusmayntu waa labada xeer ee kale ee Caraale u dhigay MMS ,gadaal ayaynu ugu tagiye xeerka koowaad aynu furfurno.
Caraale marka uu beegayo dhererka meeriska maanso waxa uu ka tiriyaa xubnaha dhawaq ee erayga ama Allanada.Hore ayaynu u sharaxnay waxa looga jeedo allan ama xubin halkan ku sii tiigaali mayno waxa inagaga filan tusaalahan gaaban erayga **Guuleed** waxa uu ka kooban yahay labada xubnood(allan) ee kala ah :**Guu+leed.**
Jiiftada hadii aynu tusaale ahaan usoo qaadano wuxu odhanayaa Caraale:Meerisyada Jiiftada ee salalkeedu asalka yihiin waxa ay u kala baxaan shan meeris oo dhiskoodu kala yahay:(5,4) (6,3) (7,2) (8,1)(9,0).tusaale aynu ku muujino:
5,4 gaagaalayaashii
6,3 Sida geed caleenloo
7,2 Habartii docdeediyo
8,1 Khamri yaanu idin hodin
9,0 Ubaxuna tin iyo cidhib.

Fiiro Gaar ah: 5,4 iwm waxa looga jeeda shan xubnood oo affar shaqal dheere wadato.
Digniin*: 6,3 iwm ha isu gayn oo ha odhan waa sagaal waayo allan iyo shaqal dheere isuma tagayaan allan+shaqal=alllan/shaqale 6 allan + 3 shaqal dheere=9 shaqal/alanle!*.

Akhriste: halkii aynu aragtida Gaariye ka nidhi jiiftadu waa sagaaley bad kasnata aynu tiro shaqalo go'an ku tusmaynay-aragtida Caraale waxa ay kugu qasbasaa inaad qaybto tusayaal badan oo aynu ka xusi karno shantan sare ee Jiiftada, kaaga sii darane tuse kasta waxa uu caraale usii dhigay habab ay baro cayiman oo ay shaqa dheerayaashu ka galaan meeriska tusaale ahaan tusaha **6,3 ts Qalinbaa saxeexee** waxa uu odhanayaa ((waxa uu u qayb samaa afar nooc marka la eego tusmooyinka saddexda shaqal dheere kala galaan waana kuwan;
1-Qalinbaa saxeexee.(*Qa –lin **baa** sa-**xee**-**xee**.)* tusmada* 3aad,5aad iyo 6aad. Ayay shaqal dheeruhu galaan (**6,3**)
2-Ruuxii sabool ihi(***.ruu**-**xii** sa-**bool** i-hi*.)Ta 1aad,2aad iyo ta 4aad. (**6,3**)

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

3-Kuu sudhay hogaanbaad.(***Kuu*** *su-dhay ho-****qaan*** ***baad***),Ta 1aad ,5aad iyo ta 6aad. (**6,3**)
4-Saaxiib ma nabad baa(.Saa-xiib ma na-bad baa.) Ta 1aad,2aad iyo ta 6aad (**6,3**)
Xusuusnow: Jiiftada 5 tusmo X 4 qaab oo shaqal dheeruhu u galo= 20 hab way badan yihiin maxaad ka filaysaa hadii gabayga oo ka dheerna lagu lifaaqo**.**

Aragtidan Caraale ee dhererka uu u adeegsaday waxa aynu odhan karnaa sidan ay u taalo hadii loo qaato waxa ka fudud ta Gaariye balse nasiib wanaag mar kale Caraale waxa uu ka dhawaajiyay arin igu dhalisay in aan mideeyo labada aragtiyood wuxu yidhi: Allanka shaqal dheeraha wataa waxa uu u dhigmaa laba shaqal gaab. Tusaale ahaan allanka **Geed** waxa uu wataa laba shaqal dheere usoo qaado 2, **Gadh** waxa uu wata hal shaqal gaab = 1, waxa la tirinayaa waa shaqalka uu alanku wato aynu meeris jiifto ku beegno:
Dugsi maleh qabyaaladi.
1 1 1 1 1 2 1 1 = 9 shaqal!
Dugsi maleh qabyaaladi wax ay dumiso mooyaane.
1 1 1 1 1 2 1 1 1 2 1 1 1 2 2 1=20 shaqal.
Miyaanay is ima labadii aragtiyood.

Halkaa waxa inooga soo dhuroobay in dhereka meeriska laga cabiro shaqallada ,aragtida Gaariyena ay si hufan usoo bandhigtay halka aragtida Caraale ay si dadban u soo gudbisay.Waxa kale oo isweydiin mudan aragtida Caraale ee xubnaha ama Allanada ee uu dhererka u adeegsatay ma sidaas ayaa lagu dhaafayaa? Jawaabtu waa maya baadhis kadib waxa ii soo baxday in xubnaha kaalintoodu ay tahay habdhaca Meeriska maanso ee aanay ahayn dhererka, dib ayay ka faahfaahin doonaaye waa inoo qormo kale oo xiise leh.

Erey-bixin
1-Tuduc: waa meeris kasta oo maanso
2-Alan= Xubin, qurubyada dhawaq ee Erayga Ts: Erayga Guuleed= Guu+leed.
3-Qodob: waa shaqalka Madiga ah ee jaangooya habdhaca maansada .
4-deelqaaf: xaraf raaca oo aan meeriska si quman loo galin ama laga tago.
5-Dalab; habdhaca maansada oo dhantaalma
6-Midhiftir:Midhiftu waa huubaha biyaha halkan waxan uga jeednaa dalab iyo deelqaaf
7-Tusmo: waa marka erayga ama meeriska allano loo qaybiyo allan walba waa tusmo.

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Q.3aad

Waa inoo mar kale iyo taxanaheenii MMS.Inta aynaan ka bixin Xeerarkii dhererka meeriska maanso waxa aynu manta is dul taagni doonaa laba kasmo oo xidhiidh la leh dhererka muran xooganina ka taagan yahay .Waa arinta farcamaha meeriska iyo shibbanayaasha W iyo Y oo shaqal ama shibbane ka loogu soo hagaagyo doodi ka aloosan tahay sidoo kalena waxa aynu u gudbi doona qodobka labaad ee dalabta lagag jiro meeriska waa Habdhaca e, kaas oo ah xeeka lagu kala socoo badaha Maansada.

Intaaba Tusaale yar aynu ka horaysiino bal dhugo akhriste labadan tuduc.
1-libaax gooni daaqiyo
2-hawd oo caleenloo

Labadan meeris haddaad u fiirsato waxa iska cad inay yihiin jiifto balse haddii aad shaqaladooda tiriso ka sare waa 10 shaqale ka danbena waa 8 shaqale! Soo inagii nidhi meeriska jiifto waa sagaal shaqale waligii ma dhaafo kamana yaraado-hadaa halkay salaadu ka xidhmi ladahay.ha boodin! Si yar oo fudud ayaynu u kala dhigi doonaa ayu ku horayno tusaalaha koowaad oo loo yaqaano eray bixin ahaan farcame

1-Farcamaha: Farcamuhu waa shaqalka dheeraadka ah ee gala meeriska maanso kaas oo uga soo gudbay hab samaysanka afka soomaaliga.Sideedaba afsoomaaligu waxa uu leeyahay-inta ilaa hadda la isku raacsan yahay- shaqalo shan ah oo gaaban marka la jiidana noqda shan dhaadheer (A,E,I,O,U) iyo (AA ,EE ,II,OO UU) haddaba marka ay erayga galaan shaqaladu waxa ay isu raacaan hab lamaanayaal ah oo gaagaaban ama dhaadheer tusaale erayga **Murtimaal** waxa ku jira afar shaqal labada hore waa lamaane aan isku xidhnayn halka labada danbe ay israacsan yihiin.Marnaba afsoomaaligu ma qaato wax laba shaqaal ka badan oo israaca,sidaa darted labada shaqal ee shibane u dhexeeyo waxa aynu u bixin doonaa Lamaane kuwa isku xidhiidhsana Mataano.ts
Gabadh: waa laba shaqal oo lamaane ah. **Geed**:waa laba shaqal oo mataano ah.intaa markii aynu isla garanay waxa soo korodhay xaalad dhif ku ah afsoomaaliga oo shaqalku madi noqdo xaaladaasna wa ta aynu bixinayno farcame hadalka iyo hawraartabana waa uu gala ts erayga **Li**baax, gaa**ri**,**ha**daba Iwm shibanaha ku jiraa ma aha lamaane mid kalena mataan lama aha ee gaarkii ayuu u madax banana yahay.

Farcamuhu marka uu hadalka ku jiro wax dhib ah ma keeno balse badaha maansad qaarkood culays badan ayuu ku keenaa oo mararka qaar meerisku jabi karo ama cuddoonaantiisa waayo sida Jiiftada iyo gabayga .Tusaale aynu ku muujino farcamaha iyo sida loo maareeyo.bal dhugo tusaalayaashan:

1-*Geen**ya**daan jeclaayeey- 10 shaqal (farcame)-meeris culus*

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

gabadhaan jeclaayeey-meeris cuddoon

2-***Ha****daan caashaq ii qaban=10 shaqal (farcame)-meeris culus*
Hadan caashaq ii qaban = 9 shaqal (meeris cuddoon).

Tusaalaaha koowaad eraygii farcamaha watay meesha waa aynu ka saarnay oo mid kale o u dhigma kase cuddoon ayaynu galinay meeriskii. Balse tusaalaha labaad shaqalkii ku xigay inta aynu mid tuurnay ayaynu kii so hadhay ku lamanaynay farcamihii kadiba labadii meerisba waa ay cuddoonaadeen.

Meerisyo farcamayaal wata iyo dabiibkooda:

1-***Ad****aa koofiloow jiitay oon dunida joogeeyne =21 Meeris culus* (farcame)
Ada koofiloow jiitay oon dunida joogeeyne=20 meeris cuddoon

2-*Hadd****ii*** *dunida lagu waarayooy daa'im noqoneyso=21 meeris culus (Farcame)*
haddi dunida lagu waararyooy dii'im noqoneyso= 20 meeris cuddon

3-*Sab****ool*** *baahan wi****xii*** *laga dhacaa waa sun iyo booge-22-meeris laba farcame leh.*
*S*abol baahan wixi laga dhacaa waa sun iyo booge =20 meeris cuddoon

4-***Col****aaddaan ka selelaa=10 shaqal meeris caato ah (farcame)*
Coladaan ka selelaa = 9 shaqal meeris culus

5-***Had****dana waan sarriigtaa=10 shaqal meeris culus (farcame)*
hadna waa sarriigtaa= 9 meersi cuddoon

6-*Intaad* ***hii****gsan leeyd gadaasha =Zaar2*,12 farcame*
intaad **hig**san leeyd gadaasha = 11 meeris cuddoon

Xusuusnoow: Aragtida Caraale si hufan ayay uga hadashay farcamaha Caraalena waxa uu ka dhawaajiyay in laga maarmi karo farcamaha waana xogta aynu halkan ku bayaaminay. Ogowse Gaariye waxa u rumaysnaa in farcamuhu aanu cudur ahay ee sidiisa lagu daayo,Tusaale ahaan waxa uu qabay in jiiftadu tahay sagaaley iyo tobanley gabayguna sido kale 20 le iyo 21 leh dhamaan badaha maansadu sidaas ayay u noqonayaan tusbax furmay waayo badkastaa farcame way leedahay sidaa darted waxa aynu qaadanay aragtida Caraale.

2-Shibbanayaasha W iyo Y

Tusaalihii labaad ee ah (**hawd** oo caleenloo) marka aad dusha ka tiriso shaqaladiisu waa 8 hadda waa jiifto sagaaley! markaba waxa aad is waydiin kartaa halka ay wax ka qaldan yihiin, lakin hadaad aad u dhuuxdo erayga Hawd waxa aad dareemaysaa inuu shaqal kale ku hoos naban yahay taasina waata

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

keetay in ay dadka qaar u qoraan Hood! Waa kobtaas meesha uu muranka shaqalnimada ama shibbananimada W iyo Y ka aloosan yahay.Gaariye iyo Caraaleba arintaa way ka carabaabeen waxa aanay ku tageen in labadan shibbane mararka qaar ay u dhaqmaan sida shaqalka balse nasiib daro wax xeerar ah oo ay arintaa ku fadhiisiyeen inooma ay soo saarin ee inaga ayay inooga tageen doorashada sida aynu ku kala garanayno. Arintaasi ama kala garashada labada siyoodna uma fududa dadka badankiisa bal tusaalayaashan ila fiiri.
1-Barwaaqo, Yar ,Waxyeelo Iwm
2-Hawd ,Laysku ,Jacayl , Xayn Hawl Iwm

Tusaalayaasha xidhmada koowaad W iyo Y waxa ay u dhaqmayaan sida shibbanaha waana sidii caadiga ahayd ee lagu yaqaanay, balse waxa ay maadi ka joogta tusaalayaasha hormada labaad oo ay u dhaqmayaan sida shaqal.Arinta xiisaha lihi maaha isgedgedigooda hadalka caadiga ah ee nuxurku waxa uu fadhiyaa marka hawraarta la tago ama Maansada waayo dhererkii shaqalka la tirinay ayaa marar W iyo Y loo tirinayaa shaqal Ts.
1-hawd oo caleenloo = 9 shaqal waayo hawd (w-da) ku jirtaawaxa ay u dhaqantay sida shaqalka!
2-Jaceylkaaga awgii = 9 shaqal waayo Y-da **jacayl** ku jirta iyo w **awgii** ku jirtaa waa shaqalo! Farcamena wuu soo galay ee la soco.

Arintan markaan in badan ka baaraan dagay waxa ii so baxday in si yar oo fudud lagu kala garan lahaa haddii la qabyo tiri lahaa af-soomaaliga waayo dhibaatadu maaha in ay xarfahani mar sida shaqalka u dhaqmayaan ee waxa ay sartu-ka-qudhu santahay shibbanayaashani waxa ay kaalinta ka riixdeen shaqalo afsoomaaliga ku jiray oo aan lagu soo darin.Sida hadda la isla qirsan yahay ama la wada yaqaano shaqalada afsoomaaligu waa shan (A E I O U) marka la kala jiidana noqda shan dhaadheer (AA EE II OO UU) balse waxa jira shaqalo aan hada daahfuri doono oo kala ah (AI=ay ,AO=ow ,AU=aw,EI,ey OU=ow) aynu tusaale yaal ku muujino:
Erayga Jacayl dadka qaar waxa ay u qoraan **jaceel** ,qaar **jacayl** qaarna **jaceyl** keebaa sax ah anigu waxa aan rumaysnahay in aan midna sax ahay ee uu ku quman yahay **Jaceil**.
Hawd,hood mise **haud** ta danbe aya ila quman. Sidaas oo kale marka ay Maansada u gudubtana waxa haboo in sidaa loo qoro hadii aynu meeris gabay soo qaadano bal ila dhugo.

Afcad baa miyiga loo faraqay **lasyku** aayiro e=20 shaqal
erayga laysku-asal ahaan waxa uu ka yimi xarfaha **la-is-ku** oo isku soo ururay halkeebaa ay hadaba **(y)** kasoo gashay kumaba jirto asalka eraygee! Waa qabyada afsoomaaliga sidaa darted waxa aynu ku sixi karnaa inaga oo nidhaahna **Laisku.**

Tusaale Shaqalada la hilmaamay

Meeris jiifto	**Dhererka**	Abwaan
Adunyadu hir weeyoo	**9 shaqal**	**Hadraawi**
Hantu uma dudaayee	**9 shaqal**	
Halis igu dardaarana	**9 shaqal**	

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Nafta **hei**san m**ai**noo Mar qudhay hall**au**daa Furataa hoggaankee Dadka ii han **wei**now Marka aad I h**oi**saan Wa in l**ai*** hagoogtaa Waxan hiil ka geli jirey Ama hoo ka tari jirey Hengel lagu taxgeliyaa Hadhow **lai** xasuustaa Hebbel **lai** yidhaahdaa	**9 shaqal** **9 shaqal** **9 shaqal** **9 shaqal** **9 shaqal** **9 shaqal** **9 shaqal** **9 shaqal** **9 shaqal**	

Xusuusnow: Lai iwm waxa loo akhriyayaa lay ee la i maaha

B-Habdhaca Meeriska maanso

Qofkasta oo in uun xidhiidh la leh suugaatu gaar ahaana maansada-ha xiiseeyo oo qudha ama baac fog ha u yeesho e dhagtiisu si fudud ayay u kala sooci kartaa haddii loo akhriyo meeris gabay iyo tuduc geeraar.Hasa yeeshee dad badan ayaan kala saari karin xeerarka iyo xaagaan kala sooca labada bad maanso ama aan qeexi karin waxa aynu midna gabay u nidhaahno midna geeraar.hormadan waxa aynu ku baran doonaa qodobka oo ah xubinta jaangoysa habdhaca ama dhawaqa maansada, sidoo kalena qumiya meeriska maanso badaha maansada kala saafa.
Labada aragtiyood ayaynu midba gaarkeeda u faaqidi doonaa sida ay uga hadashay qodobka,kadibna waa aynu isu soo foodin doona wixii inooga soo baxa.

Xusuusnow: wali waxa aynu dhex mushaaxana cudurada laga jiro meeriska maanso (dalab iyo Deelqaaf) gaar ahaan dalabta. Waxa aynu nidhi si meeris cudoon loo helo waa in la sugo cabboonaanta **Dhererka ,Habdhaca iyo Dheelitirka** .Dhererka waa aynu ka hadalnay ,dheelitirkuna ha inoo danbeeyee aynu hadhaca wax ka nidhaaho.

Aragtida Gaariye ee Habdhaca:
Xeerarkii uu Gaariye(IHUN) u dhigay Jiiftada oo qudha ayaynu wali kolba mid soo qaadanaynaa qodobkii 1aad waxa uu ahaa (Jiifto kastaa waa sagaaley ama tobanley ay xundhurtu isu dheeli tirto) inta dhererka ku saabsan hore ayaynu uga hadalnay ee waxa aynu uga soconaa waa xundhurta uu Gaariye ka dhawaajiyay in jiiftada kala qaybiso ts

Qodobka Jiiftada:
1-Sidad tahay (**ga)**maan faras
2-Higso faras(**ka)** doolaal
3-Wali dhuux (**ma)** loo shubay

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

4-Maan arag (**su)**leekhee
habdhaceeduna waa sidan (2 2 -1-2 2) ama 4 shaqal (+1 xundhur) +4 shaqal meeriska kasta oo jiifto waxa uu ka kooban yahay sagaal shaqal oo xundhurtu kala badho . Hadaba inkasta oo uu gaariye jiiftada oo qudha carabaabay inta aynu kal samaan muujino aynu nidhaahno dhamaan badaha maansada ayuu u jeeday.xundhurta waxa aynu u bixin doonaa qodob waayo badaha maansada oo dhan ayaa ka siman badaha qaarna badhtanka kama gasho ee cidhifyada ayuu qodobku galaa qaarna hal qodob wax ka badan ayaa ay leeyihiin.

Xusuusnow:Shaqalka qodobka ahi godkiisa kama guuro ee waa shub aan dhaqaaqin,shaqalada kale ayaa se is-gedgediya.

Qodobka habdhaca Gabayga:
Gabaygu waa boqorka badaha soomaaliyeed waxa uu ka kooban yahay dherer ahaan 20 shaqal waxa uu leeyahay 4 shaqal oo aa minkooda ka dhaqaaqin oo la yidhaahdo qodobo habdhiciisuna waa sidan:
(2 2 - **1** -2 2 -**1**- 2 2 -**1**- 2 2 - **1**) Ts
1-Dugsi male **qa**byaaladi **wax** ai dumi**so** mooyaa**ne** =20 shaqal
2-Anse ila **ah** aakhiru **sa**baan idi**bi**lkiisii**ye** =20 shaqal
3-Hadad dhima**to** geeridu **mar**bai nolo**sha** dhaantaa**ye**=20 shaqal
4-Waa soo **si**dnaa xeedh**yi**hiii saab**ka** loo tola**ye**=20 shaqal
5-Afku wuxu **la** xoogyahay **ma**gliga xau**da** kaa jara'**e** =20 shaqal

Qodobada habdhaca Zaar1
Zaar2 wuxu ka mid yahay badaha ugu caansan badaha maansada ee xaga dareenka bini aadamka la xidhiidha ama rooxaaniyaatka inta badana waxa loo adeegsadaa hawlaha mingiska isaga iyo zaar2-daba habdhiciisu waa sidan (**1**- 2 2 2-**1**-2)
1-kumaa helayoo **hal**macay
2-Kumei hoyadii **gob** tahay
3-Dundumo waan kula **had**laa
4-Habluhu gaagaa**ba**naa
5-Ma gudin baa lagu **jar**jaray

Qodobbada badda foofka (Maqasha)
Baddan waxa adeegsan jiray dhalaanka xoolaha raaca iyo cid kasta oo xoolo foofisa sida Geela adhiga iyo maqasha .Shaqaladeedu waa waa 7 uu midi qodob yahay, habdhaceeduna waa (2 2- 1-2)
1-Maqaleey **war**laay
2-ma laguu **wa**ramay
3-iyo maa**lin** ceel
4-sumaloow **dar**bane
5-garoy maa**da**haa

Qodobbada badda Cadaloolka
Cadaloolku waa ciyaar dhaqameed ay dhalaanku cawayskii dheeli jireen baddana tuducyo ka mid ah heeso ay qaadi jireen ayaa laga soo min guuriyay

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Habdhaceedu waa sidan (1-2 2 2-1-)
1-**Ma**roodi maroo**di**
2-**Mar**oodi cadhoo**le**
3-**Da**meer xiisaan**ka**
4-**Har**geisi ma toos**tay**
5-**Car** suuqa madoo**bi**

Qodobbada badda Heelada. habdhaca heeladu waa (1-2 2 2-1-2 2=12)
Heeladu waa bad ka mid ah kuwa ugu guunsan badaha maansada soomaalida waana bad inta badan xanxantaysa xididada dareenka caashaqa hal-abuuraduna ay ku dhayaan boogahooda kalgacal.
1-**Wi**xii la qoraa **qur**uumo hadh(ee) 12(2)
Muxuu hadal qii**mo** leeyahay
3-**wu**xuu qoro ruux**na** kama qado (oo) 12(2)
qawadi mayo qeib**ta** eebahay
4-**a**noon dhalanbaa **la** ii dhigayoo 12(2)
Ia ii dhib yaree**yay** dhaantada

5-sidii dahab baan **u** doonaay(oo) 12
Xalaan bal duqee**yay** daar madhan
Xusuusnoow: Xarfaha goobada ku jira lama tirinayo waxa keensaday isku xidhka meerisyada hadii eray yeedhmo xaga hore laga raaciyana waa la mid .
Ts.(Naa)Sidii dahab baan ku doonaay(oo) =12 shaqal

Aragtida Caraale ee habdhaca :

Dhaliisha aragtida Gaariye waxa aynu ku sheegnay in uu xeerarkiisa MS ku koobay jiiftada oo qudha ,Caraalena inkasta oo uu hawl baaxad leh qabtay halkii uu siyaabo fudud inoo taabsiin lahaa nuxurka ujeedadiisa waxa uu ka soo wareegayaa wado dheer oo raf ah taas oo raacideedu dhib ku noqonayso ardaydiisa gaar ahaana inta aan suugaanta ku talax tagin. aynu kusoo noqono qormadeena e Caraale marna muu soo hadal qaadin wax ka yidhaahdo qodob ama waxa uu yahay waxa jaangooya habdhaca meeriska maanso laakiin marka aad si akademiya u odorosto xeerkiisa 2aad ee MMS waxa kuu soo baxaya in uu udub-dhexaadkiisu ku qotomo qodobka! Waxa uu odhanayaa Xeerku:
1-Tusmayn sugan oo shaqal dheerayaashu meeriska dhexdiisa u taxmaan…. Waxa aynu furfuri doonaa xeerkan ka dibna biya dhaca labada aragtiyood ayaynu iskoo tuujin doonaa. Gabayga ayaynu xeerkan caraale ku muujin doona e waxa uu Caraale gabayga u kala qaadayaa Hojis iyo Hooris ama laba qaar **ts**.
Shan so'maaliyoo wada socdoo,**calan ku sheekeeya.** inata hakadka ka horaysaa waa hojis inta ka danbaysaana waa hooris.Aragtida hojiska iyo hooriska oo aan rumaysanay in aanay wax shaqo ah ku lahayn habdhaca iyo dhererka meeriska toona ee ujeedaduu ay tahay in ay kala soocdo xarafraaca dib ayaynu ka faalayn doonaaye sida uu Caraale u dhigay gabayga aynu u kala qaadno hojis iyo hooris. Aynu ku horayno hojiska maadaama uu ka sina-balaadhan yahay hooriska. Wali aragtidi Xubanaha(allanada) ayaa ina daba socota ee ku noqo qormooyinkii hore.

7,5 **Waa soo sidnaa xeedhyihii,**saabka loo tolaye=20 shaqal

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Furfurid alan: Waa soo sid-naa xeedh-yi-hii 7,5 (Toddoba xubnood oo affar shaqal dheere tahay)
8,4 **Lur adduunyo waa caawadaan**, wax igu laabnayne=20 shaqal
9,3 **Soo soco samoow abu hadroow**, waa ku sugayaaye=20 shaqal
10,2 **Kol hadii suldaan igu xil lihi**, igaga xaindaabtay=20 shaqal
11,1 **Lixdan aniga oo jiray tashigan**, leidha iga raacay=20 shaqal

Shantaa sal isaga oo caraale u dhigay hojiska gabay xeerkiisa tusmayntu mid walba xaagaano kale ayuu usii qaydayaa hadda hooriskikiina wuu kuu dhiman yahay! aynu soo qaadano Salka 7,5 iyo salka 8,4.
Salka 7,5: wuxu yidhi:Haddii aynu toddoba allan ee hojiska 7,5 u tirino sida ay u kala horeeyaan,kaalinta saddexaad iyo ta lixaad goor walba way ka reeban yihiin in shaqal dheerayaal galaan, labadaas mooyaane shanta tusmo ee kale waxa looga baahan yahay in allamada galaa ay wada yeeshaan shaqal dheerayaal tusaale aynu ku muujino:
Waa soo sidnaa Xeedhyihii = 1-waa 2-soo **3-sid** 4-naa 5-xeedh-**6 yi** 7-hii.U fiirso tusmada 6aad iyo ta 3aad shaqal dheere waa ka xaaraane.

Salka 8,4:Wuxu yidhi :Hojiskii salka ahaa (7,5) marka allan ka mid ah shaqal dheerayaashiisa lagu bedelo laba shaqalo gaagaaban toddoba shanlihii inta shaqal dheere ka dhinmo ayaa alan shaqal gaaban lihina ku kordhaa.Kolkaas baa siddeed-afarle (8,4) soo baxay. Ts
Geed buu ku saaraa kolkuu 7,5
Gacan buu ku saaraa kolkuu 8,4 alanki **geed** ee shaqal dheeraha watay ayaynu laba shaqal gaab ku badlanay kadibna waxa inoo soo baxay 8,4 le. Halkaa lagagama hadhayo shan tusmo oo shaqal dheeruhu galo ayuu Caraale u dhigaaa siddeed afarlaha oo kala ah (Kuwa hoosta ka xariiqsan)
1-Oo aan gadiid **maa**linimo= tusmada 1,2,4,5aad
soo hadh galahaynin
2-haasaawihii gobi laheid= tusmada 1,2,4,8aad,
Waan ka gaabsadaye =20 shaqal
3-goolmooni anigoo qaboo= tusmada 1,2,6,8aad
Daal yar goconaaya
4-Naagyahay falaadkeigan baan =tusamada 1,5,6,8aad
faalo kaa bariye
5-faranjaan ilaaleinayaa =tusmada 3,5,6,8aad
fooska soo baxaye
Fiiro Gaar ah: Tusmooyinkan uu Caraale sheegay in shaqal dheeruhu ka caagan yahay miyaynaan qodobo ku soo sheegin !

Laba sal oo oo hooris ayaa intaas oo furfurisa inaga qaatay haddii shanta sal oo dhan aynu furfurno ka gayoon mayno hada hooriskina waa kuu hadhay taasi waxa ay aragtida Caraale ka dhigasaa badweyn lagu hafto. Hooriska aynu dul istaagno (waa qaarka danbe ee gabayga inta hakadka ka danbaysa)
Wuxu yidhi: Hooriska gabaygu waa 6,2 (lix alan oo laba shaqal dheere tahay) shaqalka dheeri godadkan hoosta ka xariiqan ma gali karo.Ts

1-Geed buu ku saaraa kolkuu, **kuu gol leeyahaye** =tusamada 1,3aad
2-Calankii la taagaba waxbaa , **lagu cashuuraaye** =tusamada 4,5aad

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

3-Garta maraga adigeisku futay, **goor horeetaba e**= tusmada 1,3aad
4-Sina uma arkine wiilashani ,**weiska salaleene**= tusmada 1,5aad
5-Xirsi caamiroow leina hiif , **laguna haaraanye** = tusmada 4,5aad
6-Geeluba ugaasooy haduu ,**aayda miranaa**to =tusmada 1,4aad

Wuxu yidhi: sidaa darted hadii hooriska la damco in cuddoonaan iyo shubaal lagu curiyo waa in la daryeelo qodobada soo socda:
1-Hoorisku waa in ay had iyo goor koobaan lix alan oo laba shaqal dheereyaal tahay
2-Jagada labaad iyo ta lixaad waa shaqalo gaagaaban
3-Affarta kago ee hadhsan laba shaqal dheere waa gali karaan.

Halkaa waxa inooga cad in waxa uu Caraale ina soo wareejiyaba uu guntii iyo gabagabadii nuxurkii ina soo taabsiiyay hoorisku marka uu leeyahay jagada labaad iyo ta lixaad shaqal dheere ma galo miyayna labada jago qodobkii aynu aragtidii hore kusoo bandhignay ahayn bal xusuuso

Dugsi male qabyaaladi wax aay ,**dumiso mooyaane**
1 1 1 1 (1) 2 1 1 (1) **1 1(1) 2 2 (1)** =20 tusmada 2aad iyo 6aad!

Hadii aynu hooriskii labada aragtiyood isku soo hoorinay aynu ku noqono hojiskii soo qabo salkii 7,5
Caraale wuxu yidhi: Haddii aynu toddoba alan ee hojiska 7,5 u tirino sida ay u kala horeeyaan,kaalinta saddexaad iyo ta lixaad goor walba way ka reeban yihiin in shaqal dheerayaal galaan, labadaas mooyaane shanta tusmo ee kale waxa looga baahan yahay in alamada galaa ay wada yeeshaan shaqal dheerayaal ts.
Gaagaa**la**yaashii **ta**goow,(tusmada 3aad iyo lixaad ayaa shaqal dheere ka reeban)
Guul ma hidisaane.
Hadalka dheer ee kale inta aynu iska dhaafno miyaynaan odhan Karin qodobka ayuunbaanu shaqalku dheeri galin oo labada kaalimood ee caraale sheegayaa waa qodobkii Ts

Gaagaa**la**yaashii **ta**goow ,guul **ma** Hidisaa**ne** 20
2 2 **(1)** 2 2 **(1)** 2 2 (1) 1 1 2 (1) = 20 shaqal oo affar qodobbo tahay waa habdhicii gabayga ee aynu hore usoo baranay .

Gabagabadii qormadan waxa aynu ku baranay habdhaca iyo kaalinta uu ka qaato cudoonaanta meeriska inaga oo labada aragtiyood isku soo min guurinay sheegnayna in ay isku wax ka hadlayaan. Qormada danbe waxa aynu ku baran doonaa Dheelitirka oo ah kasmadii ugu danbaysay ee taxanihii la xidhiidhay dalabta kadibna waxa aynu u gudbi doonaa deelqaafka.

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Eraybixin:
1-Zaar2: waa qabka labaad ee saarku u dhaco tusaale
Zaar1= habluhu gaagaabanaa
Zaar2= hadaan casarkii caraa**bo**
Mararka qaar waa laysku lifaaqa laakin marka mid ba gaarkiisa loo tirsho ayay cuddoonyihiin bal fiiri maansada Wacdaraha aduunka ee hadraawi waa zaar2 sooc ah barbardhig isla maansada hadraawi ee aduunyadu waa besteed adaa dareemi doona kala cabboonaantoodee.

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Qormadii 4aad

J-Dheelitirka Maansada Soomaaliyeed

Qormooyinkii hore waxa aynu ku soo qaadanay Dhererka meeriska maanso iyo habdhaciisa oo kaalin laxaadleh ka qaata cuddoonaanta tuduca maanso dalabtana ka tira, maanta waxa aynu halkan ku lafa guri-doonaa Dheelirika meeriska maanso iyo adeegyadiisa kala gadisan.

Xusuusin: 1-Kaana siib kana saar= 8 shaqal
2-Hadad dhimato geeridu marbay nolosha dhaantaa= 20 shaqal
labadan meeris marka aad dhererkooda eegtid waxa kuu soo baxaya in ay kala dheer yihiin dabcana kala bad yihiin (geeraar iyo gabay),laakin waxa jira bado maanso oo isku dherer ah Ts
1-Haantii qabooy qooryar=10 shaqal
2-Hoheey boholaha xargaga= 10 shaqal hadana waa kala bad maxaa lagu kala garanayaa ku noqo casharkii habdhaca soo qaado ta hore:
Haantii **qa**booy qoor**yar**
2 2 **(1)** 2 2**(1)**------habdhaca Haanta
Hoheey boholaha **xar**gaga
(1) 2 1 1 1 1 **(1)** 1 1 -----habdhaca Zaar1 habdhacoodu soo makala foga-haa intaa waa iga xusuusin ogowna shaqalada goobada ku jiraa halkaa kama dhaqaaqaane ee waa qodobka jaangooya habdhaca.

Dheelitirka:

Dheelitirku waa agabka saafa kala cuddoonaanta laba meeris oo isku bad ah dherer iyo habdhacna ka siman.Waa dheelitirka halka uu fadhiyo nuxurka Xubnaha (Alanada) ee uu Caraale dhererka u adeegsay,sida aynu hore u sheegnay dhererka waxa qaabilsan shaqalka laakin xubnaha dhawaq waxa ay qabtaan dheelitirka meeriska maanso .

Bal u fiirso labadan gabay
Garas xomogle iyo ximin rag baa gabadh ku mehersadaye =20 shaqal-(meeris caato ah)
1 1 1 1 (1) 1 1 1 1 (1) 1 1 1 1 (1) 1 1 1 1 (1)
Geed xomogle iyo ximin rag baa gaadh ku meersadaye = 20 shaqal (Meeris Culus)
2 1 1 (1) 1 1 1 1 (1) 2 2 (1) 2 1 1 (1)
Labadan meeris waa isku dherer habdhacooduna waa kii gabayga hadana dhawaq ahaan way kala cuddoon yihiin ama kala shilis yihiin waa maxay sababtu? Waayo waa kala dheelitir.ka hore dheelitirkiisu waa 20,0 ka danbana waa 16,4.
Bad maanso kastaa waxa ay leedahay Dheelitir cayiman oo tusmooyin lagu jaangooyo tusmooyinkaasna kama baxo meeriska kasta oo bad maanso hadii aanu jabnayna.

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Tusomooyinka dheelitirka Gabayga:|
Gabaygu waxa uu leeyahay sagaal tusmo oo dheelitirkiisa laga beego waana kuwan (20,0 – 19,1 – 18,2 – 17,3 – 16,4 – 15,5 – 14,6 – 13,7 – 12,8).

Dheelitirka	Meeriska Gabay
20,0*	Garasxomogle iyo ximin rag kale gabadh ku mehersadae **Ga-ras-xo-mog-le i-yo xi-min rag ka-le ga-badh ku me-her-sa-da-e**
19,1	Xididdada wadnaha iyo qalbiga xadanto soo kiciye **Xi-did-da-da wad-na-ha iyo qal-bi-ga xa-dan-to soo ki-ci-ye**
18,2	Gudgudaha na miray xalay ka nagi geedi reeraha e **Gud-gu-da-ha na mi-ray xa-lay ka na-gi gee-di ree ra-ha e**
17,3	Afku wuxu la xoog yahay magliga xauda kaa jara'e **Af-ku wu-xu la xoog ya-hay mag-li-ga xau-da kaa ja-ra-e**
16,4	Dugsi male qabyaaladi wax ai dumiso mooyaane **Dug-si ma-le qab-yaa-la-di wa-ai du-mi-so moo-yaa-ne**
15,5	Haf miyaad la tidhi xaydh sidaad haan ku dhayanaiso **Haf mi-yaad la ti-dhi xaidh si-daad haan ku dha-ya-nai-so**
14,6	Goonbaartu waxay caasidaa midanay gaadhayne **Goon-baar-tu wax-ai caa-si-daa mi-da-nay gaa-dhai-ne**
13,7	Waa soo sidnaa xeedhyihii saabka loo tolaye **Waa soo sid-naa xeedh-yihii saab-ka loo to-la-ye**
12,8	Gaagaalayaashii tagoow guul ma hooysaane **Gaa-gaa-la-yaa-shii ta-goow guul ma hooy-saa-ne**

Tusmooyinka Dheelitirka ee Jiiftada: (9,0 8,1 7,2 6,3 5,4)

T.Dheelitirka	Meeriska	Miisaanka
9,0	**Ubaxuna tin iyo cidhib**	**Culus**
8,1	**Khamri yaanu idin hodin**	**Cuddoon**
7,2	**Habartii docdeediyo**	**Cuddoon**
6,3	**Waad suurad wacantee**	**Cuddoon**
5,4	**Haadaane soo joog**	**Culus**

Ogow:Gabay kasta oo aad taqaanid ama Jiifto kasta oo aad taqaanid hadaad meeris ka mid ah soo qaado kama baxayo tusmooyinka sare ku xusan mid uun buu noqonayaa waa hadii aanu jabnayn iyo hadii aan farcame ku jirin ama hadii aan shaqalada si

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

wanaagsan loo tirin gaar ahaana meelaha W Y ee aynu soo baranay.Ts aan niyada kasoo qabsado meeris gabay = dayaxaa la kala boobayaa dirirki cawleede =20 shaqal **Da**-ya-xaa la ka-la boo-ba haa di rir ki cau lee de (15,5)!

Bado maanso kastaan waxaa ay leedahay **tusmo dheelitir** ,bado intan ka badan qormada Miisaanka Maansada ayaynu ku faaqidi dooonaaye hormadan aynu ilaa saddex bad maanso oo kale tusmooyinkoooda eegno.

Tusmooyinka dheelitirka haanta: (10,0 9,1 8,2 7,3 6,4)

T.Dheelitirka	Meeriska	Miisaanka
10,0	**Baranbaradu kugu xayane**	**Culus**
9,1	**Iyo sabarandaha giiran**	**Culus**
8,2	**Laba qaar laguu kala jar**	**Cuddoon**
7,3	**Qalinkaa wax suureeya**	**Cuddoo n**
6,4	**Haantii qabooy qooryar**	**Cuddoon**

Tusmooyinka dheelitirka Zaar1(10,0 - 9,1 - 8,2 - 7,3 - 6,4)

T.Dheelitirka	Meeriska	Miisaanka
10,0	Ka baqo boholaha nabsiga	Culus
9,1	Hoheey bohalaha xargaga	Cuddoon
8,2	Dundumo waan kula hadlaa	Cuddoon
7,3	Ciduun baan heli lahaa	Cuddoon
6,4	Hidiidiiyooy hidii	Cuddoon

Tusmooyinka Badda Caddalool (8,0 – 7,1 – 6,3 – 5,4)

T.Dheelitirka	Meeriska	Miisaanka
8,0	Curadka dhaxalkani le	Caato
7,1	Hiyiga bulshadeena	Culus
6,2	Maroodi maroodi	Cuddoon
5,3	Dameer Xiisaanka	Cuddoon

Halkaa waxa inooga soo dhuroobay in bad maanso kastaa ay leedahay tusmo jaan-go’an oo ay meeriskyadeedu raacaan xubnaha dhawaq ama alanaduna sar-gooyaan Gaariye arintaa

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

kama uu hadal Caraalena aragtida xubnaha waxa uu u adeegsaday dhererka balse waxa aynu sheegnay in dhereka shaqalka laga tiriyo markaa xogtan waa mid cusub oo u baahan in la dhaliilo ama la dhiirigaliyo.

inta aynaan qormada soo afmeerin wax yar aynu ku noqo waydiinta ah tusmooyinka side ayaa lagu soo saaray tiradooda ama tafniidkooda? Waa su'aal isweeydiin mudan hadii aynu tusmooyinka jiiftada soo qaadano waxa aynu nidhi waa shan kala ah
(9,0 – 8,1 – 7,2 – 6,3 – 5,4) Sida aynu ognahay Jiiftadu waa sagaal shaqal oo mid qodob yahay markaa godka xubinta alanka ah mooyaane inta kale shaqal dheere ayaa gali kara ididlkood Ts
Gaagaa(**la**)yaashii. Ama shaqal gaab ayay noqon karan dhamaantod sida (Ubaxuna tin iyo cidhib)
hadaad xusuusato qormooyinkii hore waxa aynu nidhi : sideedaba afsoomaaligu waxa uu leeyahay-inta ilaa hadda la isku raacsan yahay- shaqalo shan ah oo gaaban marka la jiidana noqda shan dhaadheer (A,E,I,O,U) iyo (AA ,EE ,II,OO UU) haddaba marka ay erayga galaan shaqaladu waxa ay isu raacaan hab lamaanayaal ah oo gaagaaban ama dhaadheer tusaale erayga **Murtimaal** waxa ku jira afar shaqal labada hore waa lamaane aan isku xidhnayn halka labada danbe ay israacsan yihiin.Marnaba afsoomaaligu ma qaato wax laba shaqaal ka badan oo israaca,sidaa darted labada shaqal ee shibane u dhexeeyo waxa aynu u bixinay Lamaane kuwa isku xidhiidhsana mataano.taasi waxa ay ka dhigan tahay in meeshii Mataano (shaqal dheeri) ku jir aynu lamaane (laba shaqal gaab) ah ku doorsan karno (geed = Gacan). Yaynaan wabax taraarine hadi aynu nidhi Tusaalahaa (**Gaagaalayaashii**) dhamaan godadkii jiftadu marka xubinta laga reebo waa shaqalo mataano ah dhaman gododkaa waxa aynu u rogi karnaa shaqalo lamaane ah Ts
ubaxuna tin iyo cidhib.Biyadhaca araartu waxa uu yahay hadii tusaha Gaagaalayaashii anu shaqalo intaa ka badan qaadan karin isaga ayaa ugu gaaban Tusmada meeriska jiiftada waana 5,4 halka (**Ubaxuna tin iyo cidhib**) uu kala jiidmay ama dhamaan godadkii xubnuha wada shaqal gaab lamaane ah noqdeen isaga ayaana ugu sareeya tusmada jiiftada waa 9,0.
9,0 iyo 5,4 waxa u dhexeeya si xisaab ah ayaa lagu soo saari karnaaa waayo waynu garan karnaa in godadka oo dhan ay alano mataano ah noqon karaan ama kuwo lamaane ah ama isku dhaf marka xundhurta laga reebo oo iyadu sugan waxana u dhexeeya (8,1-7,2,6,3).

Halkaa waxa aynu kusoo afmeernay Qodobadi la xidhiidhay sida looga jiro meeriska maanso dalabta ,waxa aynu hore uga soo hadalnay dhereka, habdhaca iyo dheelitirka meeriska,qormada dabe waxa aynu ka hadli doonaa deelqaafka iyo xeerarkiisa oo aan kuwa hore ka xiiso yaran.

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Qormadii 5aad

Waa markale iyo taxanaheenii MMS oo in muddo ahba inoo socday waxa aynu nidhi laba cudur ayaa laga jiraa Maansada soomaaliyeed si shilayskeeda loo dhawro kuwaas oo kala ah dalabta iyo deelqaafka suugaan dhaadhiguna waxa ay u yaqaanaan Laaxin .Dalabata iyo xeerarkeedi waynu kasoo faraxalanay inaga oo bayaaminay wixii ay ka qabeen labada aragtiyood. Maanta halkan waxa aynu kusoo bandhigi doonaa xog cusub oo aanay labada aragtiyood ka hadal oo ah deelqaafka.

.

2-Deelqaafka.

Sideedaba maansada soomaaliyeed waxa ay caan ku tahay in maansadeeda loo shardiyo in ay ku socoto xarafraac ama halraac sugan taas oo ay kaga duwan tahay maansada afafka kale ee aduunka intooda badan si kale hadii loo dhigana hal-abuurka wuxu qasbanyahay in hal xaraf maansadiisa ka unko kadib meerisyada oo dhan ku taxo

Deelqaafku :waa cudurka gala meeriska maanso ee aan xaraf raaciisu sugnayn kaas oo gaadhi kara heerka Jacburka*..Halraaca duxdiisu waa inuu qurxiyo shubaalka maansada si kashu u jamato dareenkiisa dhagtana usoo jiito, sidoo kalena waa dhaabad adag oo hal-abuurka hibadiisa lagu bilkaydo sida uu uga soo baxo, maansooyinka qaar waxa ay leeyihiin hal xarafraac in ka badan sida gabayga iyo kabadda.

Xeerarka halraaca waxa lagu jaangooyaa meerisyo caan ah oo hal-abuurka u dhex ah soomaalidi horena ay maansadooda ku beegi jireen sida meeriska bada shubaalka ee (Hobala hidooy) Cidii halbeegyadaa dhigtay lama garanayo soo kii lahaa Abwaanki waynaa ee Raage Ugaaas :

Hoobaalayeey gabayga way ugu horeysaaye

Halna kama tartee maansadaa lagu hagaajaaye ….labadan meeris Raage waxa uu inoogu sheegay laba qodob oo kala ah in hoobaalayeey in ay gabayga oo dhan ugu horayso,ta labaad waxa uu yidhi maansadaa lagu hagaajaaye yaa ku hagaajiya ma isaga mise abwaan oo dhan ? way iska cadahay. waxa aynu isla eegi doonaa xeerarka halraaca iyo badaha maansada aynu ku horayno gabayga.

Halraaca gabayga

Meeriska gabayga lagu beego waa:

1-Hooyaalayeey hoyalayeey,hoyalayeey hooye

Marka aad tiris xarfaha isku midka ah ee u jira meeriska waxa kuu soo baxaya in ay yihiin affar (H) oo lababa qaar ku kala jira. Halkaa waxa aynu kaso dhiraandhirin karnaa in hal-abuurki hore ay waajb ku ahayd in uu gaabygoodu affar xaraf oo isku mid ah yeesho. Balse hayaankii dheeraa ee afka xeerkaasi wuu dabar go'aym milay sii fogna waxa la heli jiray

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

abwaano gabaygooda saddex xaraf oo isku mid ah ka unka (Saddex dhac). Ts Meeris saddex dhac ah:
Dabkaan shidi,**d**anbaabudha kici ,**d**ogobka qiiqaabi-Faarax Nuur

Baryahan danbe sid aynu la socono gabayadu waxa ay u bateeen laba dhac ama meeris ay laba xaraf oo isku mid ahi ku jiraan.hadaba laba xaraf isku meel ma galaan gabayga waxa aynu u kala qaadi doonaa laba qaar ka hore Carraale waxa uu u bixiyay hojis oo ararta ayaa lagu hakiyaa ka danbana waa hooris oo waa lagu idleeyee-waxa uu ka so dheegtay roobka. Marka uu gabaygu affar dhaco ama saddex dhaco waxa loo baahanayaa eray bixin cusub waxa aynu u bixin doonaa Hojis hilaac heego iyo hooris.

XEER: Maansada halbeegeedu hadii uu affar xarafraac wato waa uu raarmaa sidaa darteed waxa uu ku cuddoon yahay saddex xaraf labana wuu ku shilis yahay halse waa ku deelqaaf..Hadii maanso saddex xaraf halbeegeedu yahay laba ayay ku cuddoon tahay midna way ku culus tahay hal qudha se waa ku deelqaaf hadii ay laba wadatana hal ayay ku cuddoon tahayIwm.

Xeerkan aynu ku furfurno badahaa maansada gabayga sida hore u tilmaanay halbeegiisu waa affar dhacle (Hoobaalayeey hobalayeey ,hobalayeey hoobe) marka meeris gabay la sidaa tirinayo waa culays in affar xarafraac uu wato sidaa darteed saddex dhaca ayuu ku cuddoon yahay.balse markii afsoomaaligii hodantinimadiisii aysii yaraatay laba dhac ayaa laysugu soo biyo shubtay .Hadaba waxa isweydiin le godadka ay galayaan xarafraacu, hadaad xusuusato waxa aynu qormooyinkii hore ku sheegnay in faaidada hooriska hojiska iwm ay tahay in ay xarafraaca ah kala soocaan ee aanay dhererka dheelitir iyo habdhaca shaqo ku lahay sida darteed gabayga iyo badaha kale ee laba qaar iyo wax ka badan leh xarafraacu in uu qaar walba gala ayaa waaajib ah. Ts

- **H**al madow, **h**iggaad iyo Quraan, **H**a iyo Woow reebban- waa saddex dhac (hojis heego iyo hooris

Gabaygii saddex dhaca ahaa hadii aynu soo aragnay bal aynu laba dhacana eegno **(H**oobaalayeey gabayga way, ugu **h**oreysaaye): waa laba halraac oo ku jira meeris H-ley ah hojiska iyo hoorika ayaan ku kala jiraan.

Tusaalayaal qubane ah:
Bal inaan **h**abaar qabo maxaa, **h**odan I weydaarshay
Hadad **dh**imato geeridu marbay ,nolosha **dh**aantaaye
Indho **b**ururay labadooda baad, **b**idhiq ma daayaane
mar hadaan **bi**dhaan lagu arkeyn ,waa **b**ar kuma taale

Xusuusin:sida xeerka sare dhigayo gabaygi halbeegiisu afar dhaca ahaa saddex dhac ayuu ku cuddoonaaday laba dhacnma wuu ku shilisyahay balse xaraf kaliya waa ku deelqaaf ts.Dib haddii aynu ugu noqono qormadii 3aad hadda ayaa aynu ka jawaab karnaa su'aashii ahayd :
Alaa **f**axane **f**oolxuma waa , laga ducaystaaye – deelqaaf ayaa ku jira waayo?
sida muqata meerisku waa F-ley laba xaraf oo f ah ayaa ku jirana hadana deelqaaf ayuu wataa

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

sababtu waxa weeye hadii aynu nidhi labada qaar waa inu xaraf raac ku jiro lmeeriska sare hojiskii ayuu labadii xaraf isugu geeyay hooriskii ayuu deelqaafkuna galay
waxa aynu ku sixi karna inaga oo nidhaahna:
Allaa faxane **f**oolxumada waa ,laga **f**ogaadaaye.

halkaa halraacii gabayga aynu kusoo afmeerno bal dhawr bad maanso oo kalena aynu faaqidno.

Halraaca Badda heellada

Halbeega heeladu waa (**hellooy helelooy heleeligayeey**) sida muuqata halbeegedu waxa uu wataa saddex xaraf raac sidaa darteed xeerkii aynu dhiganay dib ugu noqo waxa aynu nidhi hadii halbeegu affar dhac yahay saddex ayuu ku cuddoon yahay haduu saddex dhac yahay laba. Markaa hadii halbeega heelo saddex dhac noday way adagtahay in saddexdaba hal xaraf laga dhigo sidaa darteed labada ayay ku cudoon tahay tusaale.

Wuxuu **q**oray ruuxna kama **q**ada oo
Qawadi mayo **q**aybta eebahay----------laba meeris oo Q-ley ah

Wax **b**adan **b**uste saaray **b**oogteydoo
Markey **b**ogsan weyday lay **b**aray……..labda meeris oo B-ley ah

Nafyahay **ba**talaale waad u **b**ugtee
Ku **b**ogso **b**ada maujadeedii ……Laba meeris oo B-ley ah

Arooryada hore daruur **o**nkodiyo
Uffada roobku wey **u**dgoon tahay……laba meeris oo Alifley ah.

Ku **h**oyo nabad **h**eego muuqdheer……..Meeris h-ley ah

hadaba inaga oo xeerka maanka ku hayna heelada haddii laba xarafraac wax ka badani ay galaan cidhiidhi (Raarmis) ayay noqonaysaa hadii wax ka yar ay galaan deelqaaf ayay noqonaysaa,ta anbe ayaana daran ts

minkay joogtay way ka maqantahaye
intaanay ka jabin mataanaha……..meeriska danbe deelqaaf ayaa ku jira waayo labadii xarafraac mid ayaa maqan waa aynu ku sixi karnaa inaga ooo dhahna
Minkay joogtay way ka maqan tahayee
Mugaanay ka jabin mataanaha .

Hadii **b**alankii dhab* kaa yahay
Biyaan doni **b**een kusoo sheeg …. .meeriska hore deelqaaf ayaa ku jira waayo halkii

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

laba B-ood loo baahnaa miduun baa ku jirta waxa aanu ku sici karnaa inaga oo nidhaahna.
hadii **b**alankii **b**as kaa yahay
Biyaan doni been kusoo sheeg.

Halraaca Jiiftada
Halbeega jiiftadu waa (**Hellolooy heleeyooy**)
laba xaraf raac ayay asalkeedi wadan jirtay lakin mid ayay ku qurux badan tahay
waayo way raarmasaa hadii laba xaraf si an qumanayn laysu saaro hal-abuurka qaar dhif ah ayaa jiiftada laba halraac galiya oo toosan.Ts
hadhac waliba hooslee….meeris jiifto oo laba halraac wata (cuddoon)
Aad guri gashaayoo…meeris jiifto oo caato ah waayo halraaci ayaa raarmay.

Tusaalayaal jiifto:

Sida faras **c**ag fududoo,
Cadda-horor yaqaannoo,
Gulufkiyo **c**olaadaha,
Ninka lihi **c**ad-goostaa,
Raggu kuu **c**ugtamayaa;
Anna **c**aashaqaagaan,
Hadba weel u **c**ulayaa,
Cimri-dherer hadhkaagaan,
Riyo kula **c**aweeyaa.

Halraaca Geeraarka
Halbeega geeraarku waa saddex sal leh **(helelooy heleleeyo ,helooy heeleleleeyo, , heellooy heeleleleeyo**) waa u sunne inuu laba xaraf yeesho balse waxa ku waajiba inuu hal xaraf raac wato tusaale geeraar:
Onkod roobku ma daayo – helelooy heleleeyo
Libaax giida ma daayo- heleey heeleleleeyo
Geeraar waa igu ceegoo- heellooy heeleleleeyooy
faahfaahin salalka geeraar waxa aynu ku faaqidi doona qormo sideeda u madax banana waayo wuu ka adag yahay badaha kale isaga iy badda shubaalka(waraabka) xeerarkooduna way kala baxaan.
Habdhiciisuna waa (2 2 (11) 2 (0) iyo 2 2 2 (11) 2 (0) arinta xiisaha lihi waxa ay tahay inuu geeraarku leeyahay laba qodob oo lamaane ah

Halraaca bada Biitada
halbeegeedu waa (**heelooy heelo)** hal xaraf raac inay qaadato aya loo shardiyaa waana kuwan tusaalayaasheedii;
Sheekooy sheeko

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

sheeko xariira
Biitooy biito
Biitooy laabo
koow koobaanto
Lana liibaanto ….habdhaceeduna waa sidan (2 2 2 (1))

Halraaca bada zaar2 (Baarcadaha)

Badda zaar2 ama baarcadaha halbeegeedu waa (hidiidiiyooy hidiiiyo)
tusaale
Hadaan casarkii caraabo
bal naagtaa badhida daawo
Bal buluqbuqdeeda daawo
Walaac anigoo ku seexday
Maxaan walbahaar ku toosay
Ma dhaankiibaa arooray. Habdhaceeduna waa ((1) 2 2 2(1) 2 (1)

Gunti iyo gabagabadi qormadeena ayaynu soo gaadhnay manta waxa ay hormadan ku baranay xarafraaca iyo kaalinta uu kaga jiro qurxinta meeriska maanso inaga oo sheegnay halbeegyada lagu jaangooyo habdhaca ee ab-laga soo gaadhka ah iyo sida ay toosiyaan meeriska, Qormada danbe waxa aynu ku faaqidi doonaa xidhiidhka ka dhexeeya badaha maansada waa inoo qormo kale oo xiise leh.

Eraybixin:
1-Jacbur: Bad maanso oo aan halraac sugan lahayn
2-Heego: Qaarka saddexaad ee gayagu yeesho .marka u laba dhaca yahay waa hojis iyo hooris.
3-Raarmay: sida ilkuhuba u raarmaan ayuu xarafraacu hadii si isdulsaara loo galiyo u raarmaan.

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Qormadii 6aad..

Xidhiidhka ka dhexeeya Badaha Maansada iyo Hab-samaysankooda

1-Xidhiidhka ka dhexeeya Badaha Maansada"

Badaha maansadu ma aha wax ay mid waliba iskeed isaga samaysantay ama kala madaxbanan waxa jira xidhiidho qotodheer oo ka dhexeeya taas oo badaha qaar xeerarkooda marka aad fiiriso ay kuu soo baxayso in ay kala dhanbalmeen ama ay asalkoodiii hore isku mid mid ahaayeeh balse hayaankii afdoomaaliga ka dib ay mid waliba gaarkeeda u istaagtay . Mudada ay ku kala dhanbalmeen hadii la hillaadiyo waxa ay noqon kartaa kumanaan sano waayo boqoleydii lasoo dhafay lama arag wax maanso ah oo iskeed u abuuranray.
Inaga oo taa maanka ku hayna badaha maansada wixii xidhiidh dhawi ka dhexeeyo ama kala dhanbalmay waxa aynu u bixin doonaa dir maanso

.Gaariye si wayn ayuu u tilmaamay inuu xidhiidh laxaad leh ka dhexeeyo badaha (Jiiftada, Gabayga, Haanta, Maqasha, Mulaaxda) sidoo kalena waxa uu sheegay inuu xidhiidh ka dhexeeyo badaha Zaarka,Xerta,Cadaloolka iyo heelada (dhaanto ayuu gaariye ku sheegaa) . Isaga oo sheegay in bad maanso hadii shaqal lagu kordhiyo ay ku dul kufayso bad maanso oo kale qodobkaas oo aan sida aan rumaynaahy badaha maansada dhamaantood aan koobsanayn ee ku kooban badaha isku dirka ah waayo Tusaale ahaan gabay iyo geeraar dameerahoodu isma gayaan hadaad midba shaqal ku dartana bad kale ayaa kuu soo baxasa halka qaarna hadii shaqal lagu daro aanay is badalaadinba ee luuqdu ay keensato ts.
Kaana siib kana saar: hadii shaqal lagu kordhyo waxa kuu soo baxaya kaana siib kana saaroo waa isla geeraarkii uun!

Carraale laftiisu waxa uu sheegay inuu xidhiidh ka dhexeeyo badaha jiiftada iyo cawska sidoo kale xidhiidh ayuu ka dhaxaysiiyay gabayga iyo heelada balse qodobkiisa saddexaad ee uu ku tilmaamay hormayntu oo uu u adeegsaday xidhiidhka badaha maansadu wuxu dhaafi waayay in inuu hojis gabay iyo sal heelo isku gadgadiyo-iyada oo ay jirtana heelada iyo gabaygu aad ayay u kala durugsan yihiin xidhiidh ahaan.

Qormadan waxa aynu badaha u kala qaybin dooonaa kuwo isku dir ah iyo kuwo kala jaad ah,baadhis ka dib waxa ii soo baxday in in aan uqaybiyo maansada laba bahood oo kala ah Bahda jiiftada iyo Badda Heelada iyo bado qubane ah kadibna waxa aynu faaqidi doonaa habsamaysan badaha maansada.

Dirka jiiftada (Jiiftada iyo Walaalaheed)

Dirka jiiftadu waxa ay ka kooban tahay badaha kala ah (**Mooyaha,Guuguule,**

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

,Maqasha(Foofka), Mulaaxda,Jiiftada, Haanta ,Cawska, ,Gaariye, Aloolka, Dhuule, Mulaca, Gabayga Ducada Iwm)

Dirka Jiifadu waxa ay ka unkamaan bada ugu yare e **Mooyaha** meerisyadeedu ka unkamaan

Mooyaha
Mooyaha
malablaha
Magicii
Mooyaana

Badda mooyaha marka hal shaqal lagu daro waxa kuu soo baxaya badda guuguulaha

guuguuule:
mooyaha+wa'
guuguule
guuguu da'
kakac guurso
Geel raadso
Gabadh doon guuguule laba shaqal hadii lagu daro waxa kuu soo baxaysa badii Maqasha ama foofka

Foofka (Maqasha):
Guuguule +sheeg
Maqaleey warlaay
Malaguu waramay
Sumaloow darbane
Neylaha ducduuc
oo dooxa gee

Badii maqasha hal shaqal kusii dar waxa kuu soo baxaya badii mullaaxda ee marka haweenku maydhaxda diirayaan qaadi jireeen

Mulaaxda
Naa laago laago
Naa laan galoola
Naa meyla diiran
laba shaqal kusii dar waxa kuu soo baxaysa badii jiiftada

Jiifto
Naa laago laagooy
sida geed caleenloo

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Ubax guudka qariyoo
sidd tahay cadceed subax
Ama sagal arooryaad….. hal shaqal oo qodob ah marka lagu daro jiiftadii waxa kuusoo baxaya badii haanta

Haanta

Xidigtii qarniganeey+ wa'
Haantii qabooy qooryar
Qalinkaa wax suureeya
Saaxiib kal furan weeye
Sunto faro ku heyntiisa
Jiiftada oo bahdan sal u ah hadii laba shaqal lagu daro waxa kuu soo baxaya badii cawska

Cawska(Calanka)
Soomaaliyeey toosoo
Toosoo isku tiirsada eey
Cawsaknoow sabool diidoow
Yaan suuqa lagu dhigineey Cawska hadii mid lagu sii daro waxa kuusoo baxasa bad aan u bixiyay gaariye oo ah bada ku qotonta Meeriska (Saarkii duleedoow soo dag) ama (Qudku* qaalin geel ka wanaagsan) ee gaariye ka tiriyay maansada hagarlaawe

Gaariye
Saarkii duleedoow soo dag
hagarlaawe ii gali buuga
Taariikhda aan hadhi dooonin
Bada gaariye marka laba xaraf lagu daro waxa kuu soo baxaysa badii aloolka

Alloolka
Alla waa xujooy alla waa xujooy
Geel xerada diidaa waa xujooy
Gabadh xilaha diidaa waa xujoo
Bari reerkagayagu guur haawiyee

Bad kale ayaa iyadu halkan soo galasa oo ah heesta uu qaado cumar dhuule ee ah (idishaye walaal haigu diganin) lakin may tis qaadin

Intaa kadib badihiii ayaa laban laabmaya waxana ka dhalanaya bado cusub badii maqasha oo laban laabmatay waxa ka dhashay bada mulaca

Mulaca
maqaleey warlaay maqaleey warlay

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Mulacoow hashii mayay maaragteen
Maya ee maqaarkii mawsiddaa

Jiiftadii oo laban laabantay waxa ay noqotay baddii Masafada

Badda Masafada

Dodan waxan u leeyahay dumarkiyo caruurtoo
Dadkii idinka waynaa hadday idin duleeyeen
Dambi kama ay yaabine cuntay idinka doorteen
Duunyaa la dhaafsaday dugsigaad galeeyseen
Damerkuna ma yeeleen halkay talo ku deeysteen
Dab intay shideen bay dalaq idinku siiyeen

Gabay

Haantii oo labalaabmatayna waxa ka dhashay badda gabayga!

Hoobaalayoow heedhe- hoobaalayoow heedhe
Anigoo bulaaliyo fa-dhina harada baasheeda
Anigoo barbaartii tol-kaa bilan la maalaaya
Anigoo ratiga baarka-dheer boga u laabaayaa
Ayunbuu warkiinoo bax-sani beesha soo galaye
baabuur ma raacine cag-taan boodhka soo daraye
Balankii ilaahay lu-guu wey balbalayaane

Ducada
Baddii maqasha oo markale saddex laaban tay ayaa noqotay badii ducada e ahay
(hididii hidii hididii hidii hididii hidii) waxa ka mid ah meerisyadeeda
Ashahaadadaad rune adkeeya imaanka eey
Tiirkii islaanimo waa salad ku tuntuunsadaay
Janadaa udgoone na gee ilaaha jaliila-ooow
Jidka loo maraa asa waa ninkii jecel diinta eey

Fari kama qodna Dirka jiiftada ama Jiiftada iyo walaalaheed
 balse intaa aynu kusoo af meerno.

***Dirka heelada (Heelada iyo walaalaheed)**

ilaa hadda inta ii suuro gadhay waxa bahdan ku walaaloobay dhawr bad maanso oo kala ah(Waraabka,Cadaloolka,Halaanhal (Zaar1),Baarcade (Zaar2), heelada,Buraanburka,Wadaadada Halganka Iwm)

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

dirkan waxa saldhig u ah badda waraabka oo ay ka unkamaan meerisyada waxa ka mid ah:

Waraabka (Shubaal)

badda waraabku waxa ay leedahay saddex adin oo kala habdhac ah meerisyadan ayaynu kusoo koobnay saddexda adinba.

1-Wanka weynbaa ((11) 2 2=6 shaqal
2-Waabinaayee (2 (1) 2 2)=7 shaqal
3-Waraabe ha dilo (1) 2 2 2 =7 shaqal

Saddexdaas kama baxo meeriska shubaalku waana badaha ugu gegediska badan iyada iyo geeraarku oo min saddex addin ayay leeyihiin. Markaa adinka saddexaad weeye ka ay dirka heelada isku bahyihiin soo qaado.

3-Waraabe ha dilo hadii hal shaqal lagu daro waxa kuu soo baxaya baddii caddaloolka.

Caddaloolka

waa kuwan meerisyada cadaloolku:
Waraabe ha dilo dhe
Maroodi maroodi
Marood cadhoole
Haddii col la sheego
Cadaada ku meere

laba shaqal kusii dar badda caddaloolka waxa kuusoo baxaya bada Halaanhalka ma zaar1

Bada Zaar1 (Halaanhal)

Maroodi maroodi +sheeg
aduunyadu waa besteed
Kumaa helayoo halmacay
Kumay hoyadii gob tahay
Dijaalada soo if baxay
Damiinada gaalku dhalay
Din laawaha aan gudneey.

Hal shaqal oo qodob ah marka lagu daro baddii zaar 1 waxa soo baxay zaar 2 (Baarcade) hada ma aha wax aynu ku darnay shaqal caadi ah waa shaqal qodob ah oo aan meeshiisa ka guureyn ts

Zaar2 (Baarcade)

habluhu gaagaabanaa dhe.
Sidii guuguule yeedhay
Sidii guun wiil ku curatay
Sidii godadliyo minyaradi
Miyaan kugu goohay gacalo.
Walaac anigoo ku seexday
Maxaan walbahaar la toosay.
Hadaan casarkii carraabo
Ciduun baan heli lahaaye

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Casaankiinaa I hodaye

Badii zaar2 hadii hal shaqal lagu sii daro ama badi waraabka oo labanlaaban tay waxa kuu soo baxaya bada heelada

Badda heelada

Bada heelada dherekeedu waa 12 lakin marka laysku xidhayo tuducyadeda eray xidhiidh ayaa xaga danbe ka gala aan la tirin sida (oo ee ay ooy iwm) gaar ahaan adinka hore. Sidoo kalena eray dhawaaq xaga hore waa laga galin karaa aan la tirin sidaa (Naa Waar hooy heey iwm)ts

walee adna hoogtay hooyada(yeey)
walee ana haadku iga dharag.
Anagu soconoo sarkaal na wadye
(heey) Cidii na sugeeysay eey samir
Afar shaqal markii lagu daray badi heelada waxa inoo soo baxay buraanbur

Buraanbur

Buraanburka habdhicisu waa ((1) 2 2 2 (1) 2 2 (1) 2 (1) 2) Ts.
Cadaan badanaa ma carabti sucuudigaa
Calanka soomaaliyeedoow carshiga ka nuur
Marada labadeeda dacal buu dab I qabsaday
badii Buraanburka marka hal shaqal lagu daro waxa soo baxaysa badii wadaadada lagu xifaalayn jirey ee ahayd wadaadadu beerka xaydha le wei cunaane

Wadaada

Bada wadaadada habdhaceedu waa(1) 2 2 2 (1) 2 2 2(1) 2 tusaale
Wadaadadu beerka xaidha le wai cunaan(e)
Ilaahay maad ka yaabtaanood na siisaan
Muraaqoodooo xuskii nabigeigu maran

Baddii cadaloolka oo laba jibaaran tay waxa ka dhashay bada halganka ee tidhaahda

Halgan

Dhaqaajiya dhiiga dhaliin yaradaay wa
Dhulkeena wayaane ka soo dhiciyaay wa
adoo dhimanaaya dhaqaalena heysan
Maxaad uga dhuuman nin dhoof lagu keenay

Dirka heeladu intan way ka badan yihiin ee halkaaa aynu ku soo afmeerno,

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Haddii aynu nidhi badaha qaar waa isku dir waxa jira bado aan wax xidhidhi kadhaxayn badahaas o iskood u madax banana ama ka abuurmay bado kale oo isu tagay oo kala duwan

Bado Qubane ah:

1- Bada Geeraarka

Geeraarku inkasta oo uu ka mid yahay labada badoo ee ugu caansan badaha soomaaliga marka laga reebo gabayga hadana ila hada ma hayno wax bado ah oo ka farcamay iskii ayaanu u madax bananahay taasina waata keentay inuu yeesho dhawr sal oo kala dherer ah oo aynu kusoo koobin karno meerisyadan

1-Adhi waa isku xeer (oo)= Onkod roobku ma daa(yo)= 8 shaqale (1 1 2 (11) 2)
2-Libaax waa isku xeer (oo)= suleekhaay aragaag(u) = 9 shaqale (1 2 2 (11) 2)
2-Geenyo waa isku xeer= Saarrey baanad ahain(e) = 9 shaqal (2 1 2 (11)11 2)
3-Daanyeer waa isku xeer =Geeraar waa igu ceeg (oo) = 10 shaqal (2 2 2 (11) 2)

Labada meeris ee dhexe waxa aynu ku sheegi karnaa farcame sidaa dared waxa aynu ka dhigi karnaa 8 shaqale sida libaax waa isku xeer=libax waa isku xeer.

labada sale e sugani waa 8 shaqalaha iyo 10 shaqalaha meeris gabay oo kasta oo aad taqaanidna intaa ma dhaafo ama saddexdan addin (Cag) kama gudbo.ts

Ubaxeey ubaxeey
Indho yaab badanaa
Kaana siib kana saar
Midi weyga salaaan(oo)

2-Bada Kabadda

Bada kabadda oo ka soo jeeda hees ay haweenku isku maaweeliyaan marka ay kabada samaynaaayaan ilaa hadda in la ogyahay waa bada ugu dheer badaha maansada waana 28 shaqalay arinta xiisaha lihi waxa ay tahay inay ka unkan tay saddex badeed oo isu tagay Ts Xaabsatooy kabadeey ,xadhig ma reebaay, alloow bilis xilkeed qariyeey= 28 shaqal.

Geedba geedka u dheer laga garaacyeey galool mudhay mulaaxdiiyeey.

Saddexda qaar aynu kala qaadno

1-**Xaabsatooy kabadeey**, waxa ayla habdhac tahay salkii geeljiroow dhugufloooow (2 (1) 2 2 2 ama waraabka 2 oo laba shaqal la raaciyay.
2-**Xadhig ma reebaay**; waxa ay la habdhac tahay heesta tidhahda sida dalkeenoo ,diraacdu hayso magacna ilaa hadda looma hayo.(2 (1) 2 2)
3-**alloow bilis xilkeed qariyeey**; wa badii cawska oo farcame wata ayaan suuuqa lagu dhigineey 12 2 (1) 2 2 2

Saddexdaas oo midoobay ayaa bada kabada dhalay aynu tusaale ku muujino jacbur ah **Geeljiroow dhugufloow sida, dalkeenoo ayaan suuqa lagu dhigineey !** badii kabadda maanay noqon.

Habdhaca bada kabadu waa (2 (1) 2 2 2 2 (1) 2 2 (1) 2 2 (1) 2 2 2)

Badda Biitada

Bada biitada oo ah bad ay dhalaanku isku maaweeliyaan waxa erayadeeda ka mid ah meerisyo kala gadisan hadaynu soo qaadano

Biitooyo biito
biitooy laabo.

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Sheekooy sheeko
Sheeko xariira
Shilinbaa dhuustay
Gofanaa sheegay.
koow koobaanto
Laba liibaanto
Saddex saala bidho
Affar oori jano
Shani sheekaysay
Lixi laan sheegtay
Todobaa tirisay

<u>Badda alifka</u>
Bada alifku waa badda ay qaadi jireen ardaydu marka higaad la barayo erayadeeda waxa ka mid ah:
Alif waxmaale
Ba hos ku hale
Hal ahaade
Halnimadiis
Iyo halkiisa
Hal-ku-ahaade

Kasmaalid: ma soo saari kartaa xidhiidhka ka dhexeeya badaha waalada(heleelo oo heleelo) iyo shirrabka?

Bado kale oo badan oo waxa jira xidhiidh ka dhaxeeyo qormada ayaan inoo qaadayne hada waxa aynu gali doona habsamaysan ka badaha Maansada:

2- Habsamaysanka Badaha Maansada

Hayaanka dheer ee hab nololeed ee jiilba jiil iska soo dhaxlayay waxa garab socday isbedelo dhaqan ,bulsho, siyaasadeed iyo xata kuwo diimeed oo dagalkan soomaalida soo maray.Geedigaas ayuu afsoomaaaliguna la socday mar uu kobco iyo maruu hoos u dhacaba sidaa darteeed badaha maansadu maaha wax maalin iyo habeen ku abuurma ee waa wax qarniyaal badan soo taxnaa.hadaba su'aasha isweydiinta mudani waxa ay tahay side ayaa ay badaha maansadu u samaysmeen ma badaha dhaadheer ee caanka ah ayaa hor samaysmay mise salka ayay kasoo unkameen kuwa yaryar ayaa hor samaysmay-aragtidaydan waxa aan ku saleeyay in ay badaha yaryari hor unkameen kadibna ayay badhaa waawayni ka soo farcameen

Inta aynan guda galin arinta waa in aynu maanka ku hayna in badaha isku dirka ah uu isku xeer qabanayo markaa badihii isku dir ahba gaar ayaynu uga hadli doonaa.

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Xeerarka Habsamaysanka Badaha maansada:
Xeer1: bad Maanso hadii eray bursiimo ama eray cuskasho xaga danbe lagaga kordhiyo waxa kuu soo baxaya bad maanso oo la dir ah bada laku daray.
Xeer2: bad maanso hadii eray bursiimo ama cuskasho xaga hore laga raciyo waxa kuuso baxasa bad maanso oo dir kale ah.

Dirka jiiftada:
Xeer1:
sida aynu hore usoo sheegnay dirka jiiftadu wa uu ka unkamay badda mooyaha ee tidhaahda
Mooyaha
Malablaha
Magacii
Mooyaan
Tibahana
Caban iyo
culus baa
la dhahaa

Kadib markii aynu baddii mooyaha eray cuskasho (Wa') raacinay waxa inoo soo baxay baddii guuguulaha
Mooyaha
Mooyaha Wa' =Guuguule
Baddii Maqasha eray cuskasho sii raaci waxa soo baxaya badii mullaaxda:
maqalaleey warlaay- maqaleey warlaay dhe= naa laago laago iyada hadii eray bursiimo la sii raaciyo waxa kuu soo boodaya baddii jiiftada :Naa laago laago-Wa'.
Sidoo kalena badii Jiiftada markii aynu eray cuskashi raacinay waxa inoo soo baxay baddii haanta:
Xidigtii qarniganeey- Jiifto
Xidigtii qarniganeey Wa'= Haanta

Si kale jiiftadii hadii aynu eray bursiimada Haawiyee ama waa xujooy raacino waxa inoo soo baxay badii alloolka

Sida geed caleenloo+waa xujooy= sida geed caleenloo waa xujooy=geel xerada diidaa waa xujooy

Halkaa kasii wad . Bado Maanso hadii la laba-jibaaro waxa ka dhalanaya bad maanso oo la dir ah sida Haanta hadii la laba jibaaro waxa inoo soo baxay gabay
Haantii qabooy qooryar haantiii qabooy qooryay
Hoobaalayoow heedhe hoobaalayoow heedhe
Dugsi male qabyaaladi wax, ey dumiso mooyaane

Dirka Heeladu waa sidaas oo kale hal tusaale aynu kasoo qaadano
Bada cadalooolka hadii eryga waa' lagu daro waxa kuu soo baxaya badii zaar1
maroodi maroodi= Maroodi maroodi waa'

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Xeer 2: bad maanso hadii eray bursiimo ama cuskasho xaga hore laga raciyo waxa kuuso baxasa bad maanso oo dir kale ah:
Xeerkii hore waxa aynu isla qeexnay in bad maanso hadii xaga danbe wax laga raaciyo ay soo baxayso bad maanso oo la dir ahi laakin xeerkan labaad waxa uu sheegayaa hadii bad maanso xaga hore eray bursiimo laga raaciyo waxa kuusoo baxaya bad maanso oo dir kale ah tusale
Heesta Mooyaha ee salka u ah Dirka jiiftada bal(Helleey) xaga hore ka raaci'
Helleey mooyaha =Waraabe ha dilo: miyaanay kuu soo bixin badii waraabka ee heelada la dirka ahayd

Bal heestii foofka(Maqasha) helleey xaga hore ka raaci
maqaleey warlaay: Heleey maqaleey warlaay! Waa zaar1 sidaa ayay labada xeerba u shaqaynayaan. Waa inoo qormo kale oo xiise leh.
Digniin: erey bursiimuhu waa inuu ka badnaadaa laba shaqal-laba shaqal iyo wixi ka yari madooriyaan badda hadi xaga hore laga raaciyo sida eray dhawaqa (hooy waar Naa iwm)

Eray Bixin
1-Eray Cuskasho iyo eray bursiimo:waa erayada maansada lagu qumiyo ee la cuskado sida Wa' haawiyee helleey Iwm.
2-Qudku: waa nooc kaluunka ka mid ah.

Qormadii 7aad

MIISAANKA MAANSADA SOOMAALIYEED

Qormooyinkii hore hadii aynu isbarbar dhig ku samaynay laba aragtiyood ee MMS qormadan waxa ay ku falanqayn doonaa miisaanka maansada oo mid ah ama labadii aragtiyood wixii ka dhashay iyo wixii karaankeena aynu ku kaabnay .Affar xeer ayaa saldhig u ah miisaanka Maansada oo kala ah:
1-Maanso kastaa waxa ay leedahay dherer cayiman oo laga tiriyo shaqalka
2-Qodobku waxa uu jaangooyaa habdhaca meeriska Maanso
3-Xubnaha dhawaq waxa ay qaabeeyaan dheelitirka meeriska maanso
4-halraacu(Xarafraacu)waxa uu ka jiraa meeriska deelqaafka
Affartan xeer marka ay isla falgalaan ayaa waxa ka dhasha meeris maanso oo cuddoon ama si farshaxan ah loo dhigay maanasada aan jabnayna waxa aynu u qaybin dooona saddex heer oo kala ah (Cuddoon , Culus Iyo caato ah).hadaba badaha maansada ee kala gadisan intii ay ka gaadhno ayaynu si kooban xeerarkan u waafajin doona.

Badaha maansada ee aynu beegsan doon doono (20)
Dirka jiiftada : Mooyaha Guuguule,Maqasha,Mulaaxda,Jiiftada,Haanta,Cawska,Gaariye, Aloolka Gabayga

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Dirka Heelada: Waraabka Zaar1(Halaanhal) Zaar2(Baarcade) Heelada ,Buraanburka ,Wadaadada
Baddo qubane ah: Geeraarka ,Biitada Alifka Kabadda

1-Dirka Jiiftada (Jiiftada iyo walaaleheed)

1-Mooyaha

Mooyuhu waa badda ugu nudda gaaban badaha maansada ilaa hada inta aan arkay waxa ay ka kooban tahay affar shaqal –baddan waxa gaar u lahaa haweenka marka ay hadhuudhka tumayaan ee tibaha ay isweydaarsadaan ayay hawsha isku dhaafin jireen
Halbeeg: hoobeey
Dhererka; 4 shaqal
Habdhaca : 2 0 2 *
Dheelitika: (4,0,- 3,1 - 2,2)

Meeriska	Dhererka	Habdhaca	Dheelitirka	Halraaca	Miisaanka
Malablaha	4	1 1(0) 11*	4,0	M	Culus*
Mooyaha	4	2 (0) 1 1	3,1	M	Cuddoon
Mooyaan	4	2 (0) 2	2,2	M	Cuddoon

*Habdhaca marka aynu leenahay (2 0 2) sidaas uun kuma ekaanayaan waxa laga yaabaa labada shaqal dheere inay shaqal gaaban oo kala jiidan noqdaan sida 11 0 11 ama 2 0 11 ka danbe laftiisu wuxu noqon karaa 11 0 2 balse markasta waa affartii shaqal uun .
*Badda mooyuhu waa qodob eber leh maadaama aynu nidhi afsoomaaliga wax laba shaqal ka badani isma raaci karaan eber ayaynu u dhexeysinay.

2- Guuguulaha:

bada guuguuluhu waxa ay kasoo jeedaa hees dhaqameed ay dhalaanku guuguulaha ugu heesi jireen marka uu riyaaqayo gu'gii:
Halbeeg: Hoobeeyo
dhererkiisu waa: 5 shaqal
Habdhaciisuna waa : 2 2 (1)
Dheelitirkiisu waa :(5,0 – 4,1 – 3,2)

Meeriska	Dhererka	Habdhaca	Dheelitirka	Halraaca	Miisaanka
Gabagabale	5	11 11 (1)	5,0	G	Culus
Gabadh doono	5	11 2 (1)	4,1	G	Cuddoon
Guuguule	5	2 2 (1)	3,2	G	Cuddoon

3-Badda Maqasha (Foofka)

Bada maqashu waa bad ab laga soo gaadh ah, badankana barbaarta xoolaha raacda ayaa marka ay dugaaga ka jirayaan meesiya ay raacaan ayay jidaalka iyo hawsha isku dhaafin

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

jireen .inkasta oo baddani maqasha ay caan ku noqotay hadana sidoo kale dabadhoonka geel raaca iyo riyoooluhuba heeso la mid ah ayay u qaadi jireen xoolaha ay markaa foofinayaan.
Geela waxa loogu heesi jiray:
Waa maalin caws
Iyo maalin ceel
Iyo Maalintii
Maraqiyo candadha
Laga maydhi jiraya
Riyahana :
Garoy maadahaa
Waa maalin dhow ,
Ooy mid dhashaa
Midi dhaysisaa
Midi dhaqayo tahay
Dhiil loo culaa
lagu dhiijiyaa
La dhanaaniyaa
Ciiir laga dhamaa,
Dhito laga helaa..iwm.

Halbeegeedu waa: Hoobeey hobeey
Dhereka badda foofku waa: 7 shaqal
Habdhaca bada foofku waa: 2 2 (1) 2
Dheelitirkeedu waa-: (7,0 – 6,1 – 5,2, - 4,3)

Meeriska	Dhererka	Habdhaca	Dheelitirka	Halraaca	Miisaanka
Ina cali la dilay	7	1 1 11(1) 11	7,0	C*	Culus
Dabada hunbuleid	7	1 1 1 1 (1) 2	6,1	D	Cuddoon
Maqaleey warlaay	7	1 1 2 (1) 2	5,2	M	Cuddoon
Waa maalin caus	7	2 2 (1) 2	4,3	M	Culus

- Halraaca marka ay meerisyadu badan yihiin ayuun baa la garan kara hada se mid ayuunbaynu dooranay.

4-Mullaaxda:
Mullaaxdu waxa ay kasoo jeedaa heesy ay habluhu marka ay maydhaxda diirayaan isku maaweelin jireen tuducyadeedana waxa ka mid ahaa:
Naa laago laago
Naa laan galoola
oon weli la diiran
Naa mayla diiran. .iwm
Halbeegeedu waa: Hoobeey hobeeyo
Dhererka mulaaxdu waa= 8 shaqal

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Habdhaceeduna waa : 2 2 (1) 2 (1) laba qodob ayay leedahay.
Dheelitirkeedu waa : 8,0 -7,1 ,6,2 ,5,3

Meeriska	Dhererka	Habdhaca	Dheelitirka	Halraaca	Miisaanka
Ama dabinka ila dhig	8	1 1 11 (1) 11 (1)	8,0	D	culus
Qabqablaha dagaalka	8	11 1 1 (1) 2(1)	7,1	Q	cuddoon
Oon wali la diiran	8	2 11 (1) 2 (1)	6,2	D	cuddoon
Naa laago laago	8	2 2 (1) 2 (1)	5,3	N	culus

5-Jiiftada

Jiiftadu waxa ay ka mid tahay badaha ugu guunsan kuwa soomaaliga marka laga reebo gabayga iyo geeraarka.Inta badan waxa loo adgeegsan jiray jiiftada ciyaar dhaqameeda sida Batarka Jaandheerta iyo ceerigaabida.Heesahan danbe ee muusigu ku ladhan yahay ayaa sidoo kale aad loogu adeegsaday -hees kasta oo aad raadiyow ka dhagaysato 80% waa jiifto taas oo laxankii ka dhamaysay badii jiiftada ama liinbixisay badihii kalena loo iloobay.
Halbeega Jiiftada: Hoobeey hobeeyooy
Jiiftada dhererkeedu waa :9 shaqal
Habdhaceeduna waa : 2 2 (1) 2 2
Dheelititkeeedu waa shan sal oo kala ah:(9,0-8,1-7,2-6,3 iyo 5,4)
Tusaale:

Meeriska	Dhererka	Habdhaca	Dheelitirka	Halraaca	Miisaanka
Gaagaalayaashii	9	2 2 (1) 2 2	5,4	G	Culus
Sida geed caleen loo	9	11 2(1) 2 2	6,3	S	Cuddoon
Saddex waa madoow dahay	9	1 1 2 (1) 2 11	7,2	M	Cuddoon
Hablo geesi dili kara	9	11 2 (1) 11 11	8,1	G	Cuddoon
Ina cali la dilay garo	9	11 11 (1) 11 11	9,0	C	Culus

6-Haanta:

Badda haana waa bad soo jireen ah oo haweenku marka ay Caanaha lulayaan ayay hees hawleed ka dhigan jireen markii danbena maansooyin hogotuseed iyo guubaabo nololeed ayaa laga unkay sida Maansada Sirta Nolosha.:
Halbeega:Hoobaalayoow heedhe
Dhererkeedu waa : 10 shaqaley
Habdhaceedu waa : 2 2 (1) 2 2 (1)
Dheelitirkeedu waa : (10,0 -9,1 – 8,2 -7,3, 6,4,)

Meeriska	Dhererka	Habdhaca	Dheelitirka	H.raac	Miisaanka
Baranbaradu kugu xayane	10	11 11 (1)11 11 (1)	10,0	B	Culus
Xididada wadnaha huuno	10	11 11(1) 11 2(1)	9,1	X	Cuddon
Laba qaar laguu kala jar	10	11 2 (1) 2 11 (1)	8,2	Q	Cuddoon
Qoo raan si gei baratay	10	2 2 (1) 2 1 1 (1)	7,3	Q	Cuddoon

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Haantii qabooy qooryar	10	2 2 (1) 2 2 (1)	6,4	Q	Culus

7-badda Cawska (Calanka)

Badan waxa ay kasoo jeeda hees hawleed ay haweenku qaadi jireen marka ay samaynayaan meerisyada cawska .kadiba waxa laga unkay heeso doora oo nolosha qaybeheeda la xidhiidha aynu ugu horeyso heesta calanka soomaaliya taas oo igu dhalisay in badan loo bixiyo bada calanka.
Halbeega: Heleleey heleeyooyeey
Dhererka: 11
Hadhaca:: 2 2 (1) 2 2 2
Dheelitirka; 11,0 -10,1, -9,2 – 8,3 – 7,4 iyo 6,5
*Imika wada garate ayaan filayaa dhererka iyo halraaca shaxanka ayaan inoo qaadayn ee waynu iskaga taganaa

Meeriska	Habdhaca	Dheelitirka	Miisaan
Ubaxuna tin iyo cidhib simay Gudgudaha na miray xalayeey	11 11 (1)11 11 11 11 11 (1)11 11 2	11,0 10,1	Caato ah Culus
So don la gu gu baa yi ci neey	11 11 (1) 2 11 2	9,2	Cuddoon
Tulud geela oo la dhacaad	11 2 (1) 2 11 2	8,3	Cuddoon
Rabiyoow na taageereey	11 2 (1) 2 2 2	7,4	Cuddoon
Soomaaliyeey toosoo	2 2 (1) 2 2 2	6,5	Culus

8-Bada Gaariye
badan oo aynu ugu magic darnay Maqane-jooga Abwaan Maxamed Xaashi Dhamac (Gaariye) waxa asalkeeda uu ka soo jeedaa ciyaar dhaqameeda mingiska iyo rooxaanta zaarka waxaan eraydeda ka mid aha (Saarkii duleedoow soo dag , aan kula dawaafnee soodag) sidoo kalena Kalluumaysatada ayaa hees hawleed ka dhigta marka ay malayga soo jilaabanayaan waxaanay yidhaahdaan (Qudku qaalin geel ka wanaagsan- qoyskoo dhan baa ku qamaama)
Halbeegga: Heellooy hellooy heleleeyo
Dhererkeedu waa: 12 shaqal
Habdhaceeduna waa : 2 2 (1) 2 2 2 (1)
Dheelitirkeedu waa; 12,0 -11,1 – 10,2 – 9,3 -8,4,-7,5)

Meeriska	Habdhaca	Dheelitir	Miisaan
Hididiyi hididi hididihiyo	11 11 (1)11 11 11 (1)	12,0	Caato

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Haradiyo biyaha godobaisan;	11 11 (1)11 11 2 (1)	11,1	Culus
Ma og tahay Hadraawi ma kuu war?	11 11 (1) 2 11 2 (1)	10,2	Cuddoon
Halaq baa ku raad-gadanaaya	11 2 (1) 2 11 2 (1)	9,3	Cuddoon
Aan wada dawaafnee soodag	2 11 (1) 2 2 2 (1)	8,4	Cuddoon
Saarkii duleedoow soo dag	2 2 (1) 2 2 2 (1)	7,5	Culus

9-Badda aloolka

badan waxa ay salka ku haysaa hees hawleed ay haweenku qaadi jireen marka ay aloolka tolayaan waxa erayadeeda ka mid ah:alla waa xujooy alla waa xujooy,Geel xerada diidaa waa xujooy).

Halbeega;heleleey hellooy waa heeliyooy

dhererkeedu waa; 14 shaqal

habdhaceeduna waa; 2 2 (1) 2 2 2 (1) 2

Dheeltirkeeduna waa : 14,0-13,1- 12,2 -11,3 – 10,4 -9,5 - 8,6

Meeriska	Habdhac	Dheelitir	Miisaan
Gobonimada daya iyo darajo sare	11 11 (1) 11 11 11 (1)11	14,0	Culus
Baranbaradu kuma xayan haan culane	11 11 (1) 11 11 2 (1) 2	13,1	Culus
Ubaxuna tin iyo cidhib haawiyee	11 11 (1(11 11 2(1) 2	12,2	Cuddoon
Gudgudaa na miray xalay waa jireey	11 2 (1) 11 11 2 (1) 2	11,3	Cuddoon
Gabadh xilaha diidaa waa xujooy	11 11 (1) 2 2 2 (1) 2	10,4	Cuddoon
Geel xerada diidaa waa xujooy	2 11 (1) 2 2 2 (1) 2	9,5	Culus
Roob xiinka daayaa waa xujooy	2 2 (1) 2 2 2 (1) 2	8,6	Culus

10-Gabayga

Gabaygu waa boqorka Maansada soomaaliyeed ladhkaasna waxa uu ku qaatay cufnaantiisa iyo caanimadiisa uu cidlada kaga tagay dhamaan badaha maansada ee kale .Inkasta oo la sheego inuu raga u gaaryahay hadana waxa uu ka abuurmay laba meeris oo bada haanta ah oo isu tagay taas oo ka dhigasa in asalkisii hore haweenku lahaayeen-waayo afkuba soo afkii hooyo maaha, xiliyada aroosyadana waa ay ka qaadi jireen isaga oo wata luuqda hoobaalayoow heedhe, hoobaalayoow heedhe.

Kasmaalid: Gabayga iyo guurowgu ma isku mid baa?

. Gabaygu waxa uu leeyahay sagaal tusmo oo dheelitirkiisa laga beego waana kuwan (20,0 – 19,1 – 18,2 – 17,3 – 16,4 – 15,5 – 14,6 – 13,7 – 12,8).Meeris kasta oo gabayna sagaalkaa tusmo kama baxo.

Halbeegiisu waa: Hooyaalayeey hoyalayeey hoyalayeey hooye

Habdhiciisuna waa; 2 2 (1) 2 2 (1) 2 2 (1) 2 2 (1s

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye

E-mail:caliileeye@hotmail.com

Facebook:Riix halkan

Garasxomogle iyo ximin rag kale gabadh ku mehersadae	**11 11 (1) 11 11 (1) 11 11 (1) 11 11 (1)**	**20,0**	Caato*
Xididdada wadnaha iyo qalbiga xadanto soo kiciye	**11 11 (1) 11 11 (1) 11 11 (1) 2 11 (1)**	**19,1**	Culus
Gudgudaha na miray xalay ka nagi geedi reeraha e	**11 11 (1) 11 11 (1) 11 2 (1) 2 11 (1)**	**18,2**	culus
Afku wuxu la xoog yahay magliga xauda kaa jara'e	**11 11 (1) 2 11 (1) 11 2 (1) 2 2 11 (1)**	**17,3**	Cuddoon
Dugsi male qabyaaladi wax ai dumiso mooyaane	**11 11 (1) 2 11 (1) 2 11 (1) 2 2 (1)**	**16,4**	Cuddoon
Haf miyaad la tidhi xaydh sidaad haan ku dhayanaiso	**11 2 (1) 11 2 (1) 2 2 (1) 11 2 (1)**	**15,5**	Cuddoon
Goonbaartu waxai caasidaa midanay gaadhayne	**2 2 (1) 2 2 (1) 2 11 (1) 2 2 (1)**	**14,6**	Culus
Waa soo sidnaa xeedhyihii saabka loo tolaye	**2 2 (1) 2 2 (1) 2 2 (1) 2 11 (1)**	**13,7**	Culus
Gaagaalayaashii tagoow guul ma hooysaane	**2 2 (1) 2 2 (1) 2 2 (1) 2 2 (1)**	**12,8**	Caato

Dhererkiisu waa:20 shaqale

***Fiiro gaarha**:Miisaanka Gabayga iyo badaha kaleba marka aynu kala siinayno ladhka cuddoon,culus iyo caato xeer go'an kuma qaadanayaan ee waa hadba dhawaaqa dhagtu hadba sida uu u cabiro meeriska taana waxa jaangoynka kara uun dadka suugaanta baaca fog u leh. Tusaale ahaan meeriska 20,0 waxa aynu nidhi waa caato sababtoo ah haddii lays yidhaahdo ku luuqeeya waa adayg,taa liddigeeda meeriska u danbeeya ee 12,8 haddii lagu luuqeeyo waa lagu xiiqayaa shaqaladiisa dheer awgii sidaa darted ayay kuwa dhexe u cuddoonaadeen – gabayada soomaalidana waxa ugu badan meeriska 16 ,4 oo ah ka ugu cuddoon.

Dirkii Jiiftada ayaynu qormadii hore miisaankooda ku soo faalaynay haddana dirka heelada iyo bado qubane ah ayaa aynu ku faaqidi doonaa.

2-Dirka Heelada

Waraabka Zaar1(Halaanhal) Zaar2(Baarcade) Heelada ,Buraanburka ,Wadaadada

11-Waraabka

Badda waraabka ama shubaalka qofba sida uu u yaqaano asalkii hore waxa loo adeegsan jiray hees hawleeeda waraabka ama marka xoolaha darka loogu shubayo markii danbe se markasta oo hawl la qabanayo waa la qabatimay sababta oo ah koobnideeda iyo shubaalkeeda oo hees hawleed u samaysan dabiici ahaan.
Bada waraabku waa badaha aan lahayn hal halbeeg oo sugan taa bedelkeeda waxa ay leedahay saddex sal oo kala habdhac ah hadana isku mar la adeegsado-si kale hadii loo dhigo waa saddex addinley.waxa aynu ku soo koobi karnaa saddexdeeda adin meerisyada:

Wanka wainbaa -(11) 2 2
Waabinaayee -2 (1) 2 2
Waraabe ha dilo - (1) 2 1 1 11
Saddex habdhac ayay kala leeyihiin oo kala ah:

Salka koowaad : Wanka weinbaa
Halbeega: Hobala hiddooy
Habdhac;(11) 2 2*
Dherer: 6 shaqal
Dheelitir: 4,2- 5,1 -6,0

Meeriska	Habdhaca	Dhererka	Dheelitir	Halraaca	Miisaanka

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Cashar mooyee	(11) 2 2	6	4,2	C	Cuddoon
Cad la quutiyo	(11) 2 11	6	5,1	C	Cuddoon
Haka daba fulo	(11) 11 11	6	6,0	D	Cuddoon

- (11) 2 2 labadda shaqal ee hore waa qodob marna lamaane ma noqdaan sida (2) 2 2 (X).

Salka labaad : Waabinaayee
Halbeega: hoobala hidooy
Habdhac= 2 (1) 2 2
Dheelitir;7,0- 6,1- 5,2-4,3
Dhereka : 7 shaqal

Meeriska	**Habdhaca**	**Dhererka**	**Dheelitir**	**Halraac**	**Miisaan**
**********	**11 (1) 11 11**	**7**	**7,0**	*****	*****
Dhaaya quruxsane	**2 (1) 11 11**	**7**	**6,1**	**DH**	**Cuddoon**
Ciidan kaa dayo	**2 (1) 2 11**	**7**	**5,2**	**C**	**Cuddoon**
Waabinaayee	**2(1) 2 2**	**7**	**4,3**	**W**	**Cuddoon**

- Meeriska 7,0 wax tusaale ah looma hayo .

Salka Saddexaad : Waraabe ha cuno
Habeega: hobaala hidooy
Habdhac: (1) 2 2 2
Dhererka: 7 shaqal

Meeriska	**Habdhaca**	**Dhererka**	**Dheelitir**	**halraac**	**Miisaan**
**********	**(1) 11 11 11**	**7**	**7,0**	**W**	*****
Waraabe ha cuno	**(1) 2 11 11**	**7**	**6,1**	**W**	**Cuddoon**
Wanaagoow qabo	**(1) 2 2 11**	**7**	**5,2**	**W**	**Cuddoon**
Walee suubeey	**(1) 2 2 2**	**7**	**4,3**	**W**	**Cuddoon**

Saddexdan sal mid walba bad gaarkiisa u taagan maaha iyaga oo kala gadisan ayay bad maanso sameeyaaan tusaale:
madmadoowgii
Madheedha lahaa
Kaama muuqdee
Maa lagaa madhay

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Mise Meel buu
Kuugu maqan yahay

11-Cadaloolka(Halaanhal)
Dhalaanku marka ay habeenkii dheelayaan ciyaarta cadaloolka waxa ay qaadi jireen hees dhaqameed ay erayadeeda ka mid yihiin:
Maroodi maroodi
Maroodi cadhoole
hadii col la sheego
cadaada ku meere
Hashii cosob waatan . Halkaas ayay magaca ka qaadatay markii danbena maansooyin kala gadisan aya laga curiyay sida maansada Hanbaabir,Carooga saboolka,Guga carabta Iwm
Halbeegga: hidii hidi diiyo
habdhaca: (1) 2 2 2 (1)
Dheelitirka; 8,0- 7,1-6,2-5,3
Dherer; 8 shaqal

Meeriska	Habdhaca	Dheelitirka	Miisaanka
Curadka dhaxalkani le	(1) 11 11 11 (1)	8,0	Caato
Hiyiga bulshadeena	(1) 11 11 2 (1)	7,1	Culus
Maroodi maroodi	(1) 2 11 2 (1)	6,2	Cuddoon
Dameer Xiisaanka	(1) 2 2 2 (1)	5,3	Cuddoon

12-Zaar1 (Halaanhal)
Bada aynu u bixinay zaar1 dadka qaarna ay u yaqanaan Balooleey waa bad sida badda walaasheed ee zaar2(Baarcade) loo adeegsan jiray heesaha rooxaaniga ah ama dareenka raaca gaar ahaan ciyaar dhaqameeda mingiska iyo Baarcadaha.Markii danbe se waxa laga unkay maansooyin taabanaya dhamaan dhinacyada nolosha ee kala duwan sida dhaqanka siyaasada , ababinta dhalaanka iyo heesaha danbe ee muusiga ah laftooda.
Halbeegga:Hiddiidiiyooy hiddii
Dhererkeedua waa:10
Habdhaceedu waa: (1) 2 2 2 (1) 2
Dhe,4litirkeedu waa: 10,0 – 9,1- 8,2-7,3-6,4

Tr	Meeriska	T.Dheelitirka	Habdhaca	Miisaanka

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

1	Ka baqo boholaha nabsiga	10,0	(1) 11 11 11 (1) 11	Culus
2	Hoheey bohalaha xargaga	9,1	(1) 2 11 11 (1) 11	Cuddoon
3	Dundumo waan kula hadlaa	8,2	(1)11 2 11 (1) 2	Cuddoon
4	Ciduun baan heli lahaa	7,3	(1) 2 2 11 (1) 2	Cuddoon
5	Hidiidiiyooy hidii	**6,4**	(1) 2 2 2 (1) 2	Cuddoon

13-Zaar2 (Baarcadde)

Badan Baarcade waxa ay u shubaal dhawdahay badda zaar1 hal-abuurada qaarna isku maanso ayay ku sheegaanba balse markaad habdhacooda dhagta u raariciso waxa kuu soo baxaya inay kala jaad yihiin .Hal shaqal ayay is dheeryihiin oo qodob ah marka aynu qodob leenahay waynu isla garananaa inuu habdhaca jaangooyo tusaale ahaan badda heelada eray dhawaq hadii la raaciyo habdhacu isma gadiyo iyada oo tirade laba meeris kala dheeryihiin tusaale heelo: wallee adna hoogtay hooyadayeey(14), wallee anna haadku iga dharag (12)lakin bal dhugo badda zaar1(halaanhal) iyo zaar2 (baarcade) ts.zaar1:Bal naagtaa badhida daya(10)

Zaar2 : bal naagtaa badhida daawo (11) shaqalka soo kordhay habdhicii cirka ayuu ku shareeray.

Halbeega Zaar2: Hiddiidiiyooy hiddiiyo

Dhererka: 11 shaqal

Habdhaca: (1) 2 2 2 (1) 2 (1)

Dheelitirka: 11,0 -10,1- 9,2- 8,3- 7,4

Tr	**Meeriska**	**T.Dheelitirka**	**Habdhaca**	**Miisaanka**
1	Ka baqo boholaha nabsiga dhe’	11,0	(1) 11 11 11 (1) 11 (1)	Culus
2	Ma bogan barashada aqoonta	10,1	(1) 11 11 11 (1) 2 (1)	Cuddoon
3	Kumaa helay hibo warkeeda	9,2	(1)2 1 1 11 (1) 2 (1)	Cuddoon
4	Maxaan walbahaar la toosay	8,3	(1) 2 2 11 (1) 2 (1)	Cuddoon
5	Bal haadkaa buubay daawo	**7,4**	(1) 2 2 2 (1) 2 (1)	Cuddoon

14-Heellada

Hadiii aynu nidhi gabaygu waa boqorka Maansada soomaaliyeed heeladuna waa boqoradda maansada kaalintaana waxa ay ku qadatay qaab shubaaleedkeeda aanay dhagtu ka xiiso goyn iyo iyada oo ah badda murtida iyo madadaalada,hal-abuurkuna waxa ay ku dhayaan boogohooda caashaqa iyo nabarada kalgacalka meerisyada heelada ee xididada wadnaha xanxanteeeya.Wali ma isweydiisay waxa heesaha qaraamiga ah looga xiiso goyn la yahay waayo waxay ka ka unkanaayeen meerisyo heello sidoo kalena ciyaar dhaqameeda dhaantada waxa laga unkaa heelada.

Halbeega heelladu waa: (Helooy helelooy helaaligayeey)

Dhererka heelladu waa: 12 shaqal

Habdhaceeduna waa: (1) 2 2 2 (1) 2 2

Dheelitirkeedua waa: (12,0- 11,1- 10,2 -9,3- 8,4- 7,5)

Meeriska	Habdhaca	Dheelitirka	Miisaanka
Ka baqo boholaha nabsiga dadan (oo)	(1) 11 11 11 (1) 11 11	12,0	Culus

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Wadnaha kalgaceilka kala wadhay	(1) 11 11 2 (1) 11 11	11,1	Cuddoon
Tiriig maku aragtay turuwaa	(1) 2 11 11 (1) 11 2	10,2	Cuddoon
Cidii na sugeisayeey samir (eey)	(1) 2 11 2 (1) 2 11	9,3	Cuddoon
An qaado qasiidadeedii	(1) 2 11 2 (1) 2 2	8,4	Cuddoon
Hidiidiiyooy hidiidii	(1) 2 2 2 (1) 2 2	7,5	Culus

15-Buraanburka

Inkasta oo badaha sare ee aynu soo xusnay badankooda ay asalkoda lahaayeen haweenku xataa gabayga oo aynu nidhi waxa uu ka aloosan yahay laba bad haameed oo laysu geeyay hadana waayadan danbe dumarka waa laga faramaroojiyay dhamaan badihii maansada waxaana loo soo reebay Buraanburka oo qudha!.Buraanburku waa bad shubaalkedu habdhac wanaagsan yahay oo dhagtu jamato Xididada dhiigana dhaqaajisa, hadana waxa lagu dhaliilaa inaanu halraac sugan badanka lahayn ee uu jaantaarogan yahay. Balse taa lafteeda waxa aan u arkaa maadaama ay haweenku hormood u ahayeen aasaaska badaha maansada maanta markale waxa ay calanka u sidaan sidi loo heli lahaa maanso soomaaliyeed oo furan sida kuwa caalamka-Xarafraacu aanu qasab ku ahayn.

Buraanburku gedgedoon badan ayaa ku dhacay taasina waxa ay ka dhalatay baahsanaanintiisa uu ku baahsanyahay gayiga soomaalida sidaa darteed halkan waxa aynu ku xusi doonaa uun buraanburka aan aqaano ee deeganada waqooyiga soomaalida iyo hawdka ama carro ciideeed.

Halbeega Buraanburka(A hobalaay hoobalaay hoobalaay hadaba)

Dhererka Buraanburka:18 shaqal

Habdhacisuu waa: (1) 2 2 2 (1) 2 2 (1) 2 (1) 2

Dheelitirkiisuna: (18,0- 17,1 -16,2- 15,3- 14,4 – 13,5 – 12,6 -11,7)

Meeriska	Habdhaca	Dheelitirka	Miisaanka
……	(1)11 11 11 (1) 11 11 (1)11 (1) 11	18,0*	
…….		17,1	
Ma gamo gudcurkani dam yidhi waan galgalanayaa	(1) 11 11 11 (1) 11 2 (1) 11 (1) 2	16,2	
Marada labadeeda dacal buu dab ii qabsaday	(1) 11 11 2 (1) 11 2 (1) 2 (1) 11	15,3	
Cadaawe haduu is dilo waabu kala durkaa	(1) 2 11 2 (1) 11 2 (1) 11 (1) 2	14,4	
Calanka soomaa**li**yeedoow **cir**shiga **ka** nuur	(1) 11 2 2 (1) 2 2 (1) 11 (1) 2	13,5	
Abuurta miyaan lahaa oon ilaah ahaa	(1) 2 11 2 (1) 2 2 (1) 2 (1) 2	12,6	
Cabdoow dhuudhuubanoow dhuuxa reer cigoow	(1) 2 2 2 (1) 2 2 (1) 2 (1) 2	11,7	

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

*Ilaa hadda labada meeris ee 18,0 iyo 17,1 kuma arag Buraanburka.

16-Bada wadaaddada

Badan waa hees ay dadku xifaalayn jireen wadaaddadii hore oo lagu xaman jiray inay shalaad iyo wardiga marka ay rogaan ay dadka wanan kaga loogan jireen iyaga oo lo aaminsanaa inay karaamo iyo burji leeyihiin reerkii aan wax siina balaayo iyo baas haleeli doono. Badan waxa eryadeeda ka mid ah (Wadaadadu beerka xaidha leh wei cunaaneey ,ilaahaay maad ka yaabtaanood na siisaan))

Halbeega: heleeleeyooy heleeleeyooy heleeyooy

Dhererka 19 shaqal

Dheelitirka: 19,0 18,1, - 17,2 – 16,3 – 15,4 - 14,5 – 13,6 – 12,7 iyo 11,8

Habdhaca: (1) 2 2 2 (1) 2 2 2 (1) 2 2

Tusaale

1.Wadaadadu beerka xaidha le wei cunaanee =19 shaqal

(1) 2 11 2 (1) 2 1 1 2 (1) 2 2 =13,6 dheelitir

2-Wankii badhi laa balaayada kaa xijaabee =19

(1) 2 1 1 2 (1) 2 11 2 (1) 2 2

Badan waxa aynu shaxa ugu samayn waynay iyada oo ah bad aan tisqaadin ama aan tusaale loo heli Karin.

3-Bado Qubane ah

Geeraarka,Biitada , Alifta , Kabadda.

17-Badda Geeraarka:

Geeraarku waa badaha ugu guunsan badaha soomaaliga xaga caanimada waayadii hore gabayga ayuunbaa ka horeeyay-ragii horena badankoodu way gabyi jireen ama way geeraari jireen.Geeraarka badanka waxa loo adeegsan jiray amaanta gamaanka iyo goolaaftanka dagaalka.

Geeraarku inkasta oo uu yahay bad soo jireen ah hadana sida uu Caraale sheegay waa badaha ugu tarmida yar ilaa hadana wax bad ah oo ka farcamay lama hayo.

Geeraarku waa bad amran waxa aanu leeyahay laba qodob oo isku dhagsan ama mataano ah sidoo kalena waa badaha aan sal sugan lahayn ee xeerar kala gadisan qaata sida badda waraabka waxa uu leeyahay saddex adin oo kala habdhaca waxana kusoo koobi karnaa weedhaha

1-Adhi waa isku xeer (oo)- 11 (11) 2 =8 shaqal

2-Libaax waa isku xeer (oo),Geenyo waa isku xeer- (1- 2 2 (11) 2), 2 -1- 2 (11) 2=9 shaqal

3-Daanyeer waa isku xeer – 2 2 2 (11) 2=10 shaqal

Salka labaad inkasta oo farcame lagu tilmaami karo hadana waydiintu waxa ay tahay ma salka 1aad ayuu ka farcamay mise ka saddexaad sidaa darteed iskii ayaan u daynay.Marka aynu leenahay waxa uu leeyahay saddex sal taas macaneehu maaha waxa jira geeraar dhamaan meerisyadiisu salka 1aad ka wada unkanyiin ee geeraar qudha ayaa saddexda salba laga heli karaa.

*Xusuuso badii waraaabka ee saddexda adin lahayd.

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Salka 1aad:
Adhi waa isku Xeer :
Halbeegga: Hoboleey hoboleeyo
Dherer; 8 shaqal
Habdhac: 2 2 (11) 2
Dheelitirka:8,0 -7,1 -6,2, -5,3

Meeriska	**T.Dheelitirka**	**Habdhaca**	**Miisaanka**
……	8,0	11 11 (11) 11	Caato
Horta reerku ha dago	7,1	11 2 (11) 11	Culus
Inta doonida qaad (oo)	6,2	11 2 (11) 2	Cuddoon
……	5,3	2 2 (11) 2	Culus

Salka 2aad: libaax waa isku xeer (geenyo waa isku xeer)
Halbeega" hobeeyooy hoboleeyo iyo hoobey hoobololeeye
Dheelitirka:9,0 – 8,1- 7,2 – 6,3
Dhererka: 9 shaqal
Habdhaca: 1- 2 2 (11) 2 iyo 2 -1- 2 (11) 2

Meeriska	**T.Dheelitirka**	**Habdhaca**	**Miisaanka**
…….	9,0	1-11 11 1(1) 11	Caato
……	8,1	1 11 2 (11) 11	Caato
……..	7,2	1 11 2 (11) 2	Culus
Kaana siib kanna saar	6,3	2 -1- 2 (11) 2	Cuddoon
Libaax waa isku xeer	6,3	1- 2 2 (11) 2	Cuddoon

Salka 3aad: Daanyeer waa isku xeer
Halbeegga: hoobeeyooy hoboleeyo
Habdhaca" 2 2 2 (11) 2
Dhererka:10 shaqal
Dheelitka: 10,0 – 9,1 – 8,2 – 7,3 – 6,4

Meeriska	**T.Dheelitirka**	**Habdhaca**	**Miisaanka**
…….	10,0		
……	9,1		
……..	8,2		
…….	7,3		
Geeraar waa igu ceeg (oo)	6,4	2 2 2 11 2	

- Inkasta oo aynu shaxanka geeraarka sidaa u dhignay hadana ilaa hadda inta geeraar ee aan arkay wali ma arag geeraar ay meerisyadiisa ka baxsan yihiin affartan meeris ee kala ah
  1- inta doonida qaad (Adhi waa isku xeer)= 8 shaqal
  2- Suleekhaay aragaag(u) (Libaax waa isku xeer) = 9 shaqal

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

3- Kaana siib kanna saar (Geenyo waa isku xeer) = 9 shaqal
4- Geeraar waa igu ceeg (Daanyeer waa isku xeer) =10 shaqal
mar dhif ah ayaan ku arkay geeraar dhaqameedka ubadka lagu sabo ee hooyo caano I sii meeriskaas oo ah (horta reerku ha dago) oo labada shaqal ee u danbeeyaa aanay mataano ahayn.

18-Badda Biitada

Baddani waxa ay magaca ka sidataa ciyaar dhaqameed hore oo dhalaanku cawayskii golayaasha ama guryaha ku dheeli jireen taas oo ay meerisyadeeda ka mid ahaayeen biitooy biito, biitooy laabo. Markii danbena bad sideeda u madax banana ayay noqotay oo duluc kala gadisan loo adeegsaday siiba dhalaanku.
Halbeegeedu waa : heelooy heelo
Dhererkeedu: 7 shaqal
Habdhaceedu: 2 2 2 (1)
Dheelitirkeedu" 4,3 – 5,2 – 6,1 iyo 7,0

Meeriska	Habdhaca	Dhererka	Dheelitirka	Miisaan
Todobina tirisay	11 11 11 (1)	7	7,0	Culus
Affar oori jano	11 2 11 (1)	7	5,2	Cuddoom
Gofanaa sheegay	11 2 2 (1)	7	6,1	Cuddoon
Biitooy biito	2 2 2 (1)	7	4,3	Cuddoon

19-Badda Alifka

Baddan oo ay dhalaanku ku qaybi jireen higaada af-carabiga lana sheego inuu hal-abuuray midhaheeda Sheekh Yuusuf Al-kawnayn markii danbe se maansooyin kale oo la ologa ayaa laga curiya sida maansada hadraawi ee hal iyo halkiis.
Halbeega: Had abuure, Haad abuure, Haadad abuure

Habdhaca; 1 (1) 2 (1), 2 (1) 2 (1) iyo 2 1 (1) 2 (1)
Salka 2aad aynu tusaale ku muujino
Haad abuure
Dhererka: 6 shaqal
Dheelitirka: 6,0 – 5,1 iyo 4,2

Meeriska	Habdhaca	Dheelitirka	Miisaan
Halal ka curinle	11 (1) 11 (1)	6,0	Culus
Halnimadiisa	11 (1) 2 (1)	5,1	Cuddoon
Haad abuure	2 (1) 2 (1)	4,2	Cuddoon

Kasmaalid: labada addin ee kale soo saar shaxankooda.

20: Badda kabadda

Bada kabadu waa bada ugu meeris dheer badaha maansada inta hada la daahfuray waana 28

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

shaqaley ,waana bad ay haweenku cod toolmoon oo luuqleh ku qaadaan marka ay kabadda samaynayaan si ay hawsha isugu dhaafiyaan.inkasta oo aynu badda kabaddu tahay badda ugu meeris dheer hadana ma jirto maanso kabad ah oo taabo gashay balse waa meerisyo goosgoos ah mid gaarkiisa loo qaado .
Halbeegga; heelolooy helelooy heeleleeyooy helooy heleleheeyooyeey
Dhererka:28 shaqal
Habdhaca: 2 (1) 2 2 2 2 (1) 2 2 (1) 2 2 (1) 2 2 2
Dheelitirka: 28,0 – 27,1 – 26,2 – 25,3 - 24,4 – 23,5 – 22,6 – 21,7 – 20,8 – 19,9 – 18,10 – 17,11 – 16,12.

Meeriska	Dheelitirka	Miisaan
Naagta kabada leheey kaaalin daraneey adaaan kaid usii dhiganeey	20,8*	Cuddoon
Geedba geedka u dheer laga garaaacyeey galool mudhay mulaaxdiiyeey:	19,9	Cuddoon
Naag an daah xidhaneey doco dalooleey ninkaagii dabeil raacyeey;	18,10	Cuddoon

* Inkasta oo dheelitirka Kabaddu yahay 13 tusmo ee sare ku xusan hadda saddexdan meeris mooye tusaalayaal kale waan u waayay dheelirada kale.

Akhristayaal halkaas waxa inoogu soo idlaaday taxanaheenii midaynta iyo midhiftirka Miisaanka Maansada waxa aan filayaa in aad xog badan ka korodhsateen qormooyinkan hadii wax dhaliila ama dhiiri galina aad hayso fadlan e-mailka caliileeye@hotmail.com noogu soo dir waayo Kasmadan waxa aanu rabnaa in aanu u rogno dhigane (buug) dhawaan soo bixi doona.Mahadsanidin

DHAMAAD

Tixraac:

1-Miisaanka Maansada Soomaaliyeed (Carraale)
2-Mahadhada iyo waxqabadka MX Dhamac Gaariye

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan

Miisaanka Maansada Soomaaliyeed:Midayn Iyo Midhiftir

Qalinkii :Cali Sh.Maxamed Cabdi (Cali Ileeye
E-mail:caliileeye@hotmail.com
Facebook:Riix halkan